# Golaha Wakiillada

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5^aad ee Wakiillada, Fadhigii 5^aad ee Kal-fadhiga 6^aad*

***Wakhtiga 09:52* AM** ilaa **11:22 Am**
***Taariikhda: - Isniin 14 August 2023***

**Guddoonka: -** Md. Yaasiim Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Quranka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Qiimaynta Xaaladda Guud ee Dalka

**Md. Jaamac Abokor Maxamed** *(4min, 28Sec):* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Shir-guddoonka, bahda saxaafadda, shacbiga Jamhuuriyadda Somaliland iyo shaqaalaha dhammaantiin, **Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh**, bacda salaam.

Waxaan halkan tacsi tiiraanyo leh uga dirayaa ciidamadii Booliska ee ku shahiiday goobta la yidhaahdo **Gacan-Libaax**. Ilaahay waxaan uga baryayaa in uu u naxariisto, dambigoodana dhaafo, Janatul-Fardowsana geeyo. Ehelkoodii iyo guud ahaan Qaranka waxaan uga tacsiyadaynayaa, Ilaahayna waxaan ka baryayaa samir iyo iimaan inuu inaga wada siiyo.

Sidoo kale, waxaan aad iyo aad u cambaaraynayaa falaagadii fal-dambiyeedkaa geystay. Waa fal argagixiso oo aan hore dalka uga dhicin. Runtii, maalmahan waxa la is waydiinayaa in talo qaran la keeno. Talada qarankuna waa in runta la sheego, xalna la keeno. Xalka cidda laga filayaa waa innaga; looma baahna maanta in arrimaha la xisbiyeeyo, la reereeyo ama la qofeeyo. Waxa innaga la doonayaa waa wixii aynu ku kala badbaadi lahayn, nolosheennuna ku sii jiri lahayd, qaranimadeennuna ku sii jiri lahayd—innaga iyo Golayaasha aynu ka midka nahayba.

Anigu waxaan qabaa in wixii dhacay ay dhaceen, balse laga hortago in wax dambe dhacaan. Tallaabada koowaad waa in la joojiyo wixii sii kicin kara, lana hawlgeliyo dhammaan muwaadiniinta Somaliland iyo cid kasta oo nabadda jecel, si arrintu halkaas ugu istaagto.

Qodobka labaad, arrintu laba jiho ayay ka socotaa: xukuumadda iyo mucaaradka. Labaduba waxay u baahan yihiin inay caqli keenaan. Dagaal iyo buur la galo xal lagama gaadho. Qolada buurta fuushay, buur qaran laguma iman karo, Madaxweynena laguma iman karo. Halkaa ceeb, dhiig iyo khasaare baa yaalla, dhammaantoodna waa lagu madhanayaa.

Waxa la innaga doonayaa in talada miiska la dhigo, wixii la kala tabanayana miiska dushiisa lagu dhammeeyo. Madaxweynaha waxaan leenahay: haddii aad is lahayd keligaa wax maamuli kartaa, arrintu meel fog bay inala tagaysaa. Ilaahay baa ina arkaya, umaddii ina dooratayna way ina arkaysaa. Gar waa loo wada Islaam. Qofkii qarankan wax ka hagradaa qoys, qaran iyo sharafna wuu jabinayaa.

Waxaynu u baahanahay inaan ka shaqayno sidii laysaga badbaadin lahaa xaaladdan. Casharkii Laascaanood aynu ka qaadanay maanta waa in aanu mar kale sahlan. Waa inaynu u guntannaa, Goluhu dareeraa oo hawsha galaa; dhaqaale, talo iyo wakhti waa in aynu ku bixinnaa. Ciddii nabadda ka shaqaynaysa waa in aynu taageernaa, ciddii ka hor imanaysana runta aynu u sheegnaa.

**Md. Cabdiqani Maxamed Aadan** *(1min, 31Sec):* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, aad iyo aad baad u mahadsan tahay.

Xaaladda dalka maanta waynu wada ognahay halka ay marayso. Annaga Gole ahaan, masuuliyad baa inaga saaran sidii nabadgelyada looga talin lahaa. Xilliyada doorashada khilaafyo baa yimaadda, arrinta buurta Gacan-Libaaxna waxay salka ku haysaa arrimaha doorashooyinka.

Waxaad mooddaa in xukuumaddu, gaar ahaan Madaxweynaha, ka gaabisay sidii xal loo heli lahaa. Inta badan, marka arrimahan oo kale yimaaddaan, waxaa la yidhaahdaa odayaal ama wasiirro ha la diro, balse tallaabo wax ku ool ah ma muuqato. Dhibaatadan Gacan-Libaax waxa ay salka ku haysaa tallaabooyin Dastuuriyan ah oo xukuumadda ka yimid.

Haddii aanay xukuumaddu tanaasul samayn oo aanay dhagaysan xisbiyada mucaaradka, arrintu way adkaan doontaa. Sidaas darteed, waxaan xukuumadda u soo jeedinayaa in tanaasulka iyadu bilowdo; haddii kale, buurta Gacan-Libaax mooyee, buuro kale ayaa la geli doonaa. **Wa bilaahi towfiiq, waad mahadsan tihiin.**

**Md. Cabdilaahi Yuusuf Axmed** *(4min, 40Sec):* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.**Shir-guddoonka Golaha Wakiillada, Mudanayaasha Golaha, bahda saxaafadda iyo shaqaalaha dhammaantiin, **Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh**.

Ugu horreyn, waxaan tacsi tiiraanyo leh la wadaagayaa Qaranka Somaliland, Ciidamada Booliska iyo qoysaskii ay ka baxeen ciidamadii shalay la aasay. Ilaahay ha u naxariisto, samir iyo iimaanna ha inaga wada siiyo.

Mudane Guddoomiye, wixii dhacay waa dhaceen, balse waa in aynu xalka raadinnaa. Anigu waxaan soo jeedinayaa in loo yeedho Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo taliyeyaasha ciidamada amniga, gaar ahaan Booliska iyo Sirdoonka, si looga helo xog dhamaystiran oo ku saabsan dhacdadii lagu laayay ciidanka. Marka xog la helo, talo ayaa la heli karaa.

Qaranka Somaliland maanta uma baahna buuro, jabhado iyo kala fogaansho. Arrinta la isku hayo waa doorashooyin, waana in miiska lagu dhammeeyaa. Daneeyayaasha doorashadu waa 13, sidaas darteed waa inay si degdeg ah isugu yimaaddaan daneeyayaashaasi iyo Komishanka Doorashooyinka.

Sidoo kale, hawshii ay wadeen Shir-guddoonka iyo xildhibaanadii kale, waxa fiicnaan lahayd in Golaha laga warbixiyo halka ay wax marayeen iyo meelaha ay ku adkaadeen. Deegaannada arrintu ka taagan tahay waxa laga soo doortay xildhibaano gaar ah, waana inay hormuud ka noqdaan xalka; annaguna diyaar baanu u nahay inaan ka qaybqaadanno.

Madaxweynuhu wuu imanayaa wuuna tegi doonaa, Golahanina sidaas oo kale. Waxa keliya ee waara waa nabadgelyada iyo qaranimada. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in aynu u yeedhno masuuliyiinta khuseeya, hawshana si wadajir ah u qabanno, annaga oo ah hay'adda kaliya ee muddadii sharciyeed ku fadhida.

Waxaan ku soo gabagabaynayaa anigoo Madax-dhaqameedka hore hawshan ugu jiray leh: Ilaahay ha idiin fududeeyo hawsha aad Qaranka u haysaan. Waxaan kaloo talo u soo jeedinayaa Madax-dhaqameedka in ay si cad uga hadlaan dhacdadii lagu laayay ciidamada Qaranka, isla markaana ay xaal iyo raalligelin ka siiyaan cidii dhibaatadu gaadhay, doorkoodana ka qaataan qabashada iyo keenista sharciga hortiisa gacan-ku-dhiiglayaashii ka dambeeyay falkaas.

**Md: Cabdiraxmaan Yuusuf Maxamuud (Badheedhe**) *(2min, 20Sec): -* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Xildhibaanada aan Golaha wada fadhinno, bahda saxaafadda iyo martida noo ah, Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh. Saaka waxa inoo furantay dood aynu wax iska waydiinayno xaaladda dalka uu ku sugan yahay. Innaga oo ah Golaha Baarlamaanka iyo hay'adda sharci-dajinta ee ummadu soo dooratay, awood iyo masuuliyad weyn baa ina saaran, mana aha wax sax ah in aynu iska indho-tirno xaqiiqada taagan. Wax badan baynu qaban karnaa.

Anigu waxaan ka mid ahay xildhibaanadii laga soo doortay aagga ay askarta aynu wada tacsiyadaynay ku dhinteen, Ilaahay ha u naxariisto. Waxay ahayd wax inagu dhacay oo aynaan u baahnayn, kugu-dhimasho iyo kaa-dhimasho midna. Waxaan xildhibaanada ka codsanayaa in aynaan dheg u dhigin dadka TV-yada fadhiya iyo kuwa baraha bulshada ka hadlaya, balse aynu u jeedsanno dadka xalka keeni kara. Dawladda innaga ayaa ku khasbi karna, odayaasha innaga ayaa diri karna, dadkeenana innaga ayaa la hadli karna. Saaka xildhibaan Cabdilaahi wuu naga maqnaa, balse waan wada hadalnay, dadkeennuna si toos ah ayay u saamaysay, telefoonnaduna way nagu soo dhacayeen, imikana waanu is-raacsannahay.

Waxaa loo baahan yahay in aynu innagu talada dejinno. Go'dayar waa halka codkaygu yaallo ee layga soo doortay. Dhibaato weyn baa dalka ka dhacday,

waanan ka tacsiyadaynayaa, waanan ka wada xunahay. Dadkii dhintay waa inamadeennii; meel qabiil gaar ah looguma beegsan. Haddii loo baahdo, anaga ayaa faahfaahin idin siinayna halka ay wax ka dhaceen, masaafo ahaan qiyaastii afar kiiloomitir.

Waxaan xildhibaanada ka codsanayaa in aynu ka faa'iidaysanno codka iyo miisaanka aynu leenahay. Salaadiinta iyo waxgaradkuna way is-abaabulayaan si rasaasta loo joojiyo. Dawladdu damaanad ayay dalbanaysaa, kuwa kalena damaanad ayay dalbanayaan. Sidaas darteed, waxaan idinka codsanayaa in aynu maanta isku raacno in aan wax dambe halkaas ka dhicin, xalkana aynu wadajir ugu kacno.

**Md. Axmed Cabdi Ibraahim (Timo-jilic)** *(7min, 12Sec): -* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, tacsida waan la wadaagayaa xildhibaanadii iga horreeyay. Qolada buurta fuushay ma canbaaraynayo mana ku sifaynayo wax kale, balse qodobka ugu muhiimsan waa in aynu galno xalinta arrinta taagan. Arrimaha nabadgelyadu waa tiirka nolosheena, waana waajib qaran iyo mid goleba ina wada saaran. Waa in aynu isku duubni ku shaqaynaa sidii aynu u sugi lahayn nabadda iyo xasiloonida.

Arrimaha siyaasadda iyo dimuqraadiyaddu waa meelaha inta badan khilaafku ka dhasho, waxaana sii xumeeya erayo iyo hab-dhaqan aan si taxaddar leh loo wajihin. Gole ahaan waa in aynu ka fogaannaa hadallada abuuri kara daganaansho la'aan iyo cabsi bulsho. Marka dagaal bilaabmo, waxa imanaya sicir-barar iyo dhaqaale-xumo; sidaas awgeed, waa in aynu dib ugu noqonnaa miisaaniyadda oo la dhimaa kharashaadka aan daruuriga ahayn, marka laga reebo difaaca dalka, si loo yareeyo culayska dhaqaale.

Dayacaadda shuruucdu waa mid ka mid ah sababaha keenay xaaladda maanta taagan. Sidaas darteed, qaran ahaan iyo gole ahaanba waa in aynu ka feejignaannaa. Waxaan qabaa in qorshe qaran loo sameeyo sidii Laascaanood iyo Gacan-libaaxba nabad loogu soo dabaali lahaa. Arrintan lama soo duuduubin karo; waa in si qaran oo dhab ah looga hawlgalaa, lana joojiyaa wax kasta oo warbaahinta lagu faafinayo ee sii kicinaya xaaladda.

**Md. Axmed Dayib Aadan (ku-cadeeye)** *(3min, 26sec):* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, marka koowaad waxaan ka tacsiyadaynayaa Qaranka iyo qoysaskoodiiba ciidankii Qaranka ee ku geeriyooday falkii Buurta Gacan-Libaax. Waxaan canbaaraynayaa, eedaynayaana—la gaban maayee—shuftada arrimaha nabad-galyada darro iyo dilkaba ka gaysatay Buurta Gacan-Libaax.

Marlabaadka, waxaan hoosta ka xariiqayaa in arrinta Gacan-Libaax aanay Xukuumad iyo Xisbi midna gaar u ahayn, Somaliland iyo Qabiilna aanay ka

dhaxayn, balse ay yihiin inamo shufto ah oo inooga baahan in aynu qaran ahaan wada hawl-galno.

Arrimahanimaha Doorashooyinka, arrimaha doorashooyinku waa khilaaf waligiiba soo jiri jiray marka ay doorashooyinku soo dhowaadaan. Sidaa darteed, Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa in la tixgeliyo in ay jirtay guddi si iskeed ah isku xil-qaantay oo uusan Goluhu dirrin.

Haddaba, waxaan soo jeedinayaa:

- In Guddi rasmi ah uu Goluhu magacaabo si ay u soo daraasayso khilaafka u dhexeeya Xukuumadda iyo daneeyayaasha siyaasadda, isla markaana go'aamo buuxa ugu soo celiso Golaha, go'aankaasna Goluhu meelmariyo, ha noqoto Guddidii hore ama mid cusub.
- In dhammaan Mudanayaasha Goluhu ka wada qayb-qaataan xalinta arrintan, haday noqoto talo, haday noqoto kalmad wanaagsan, ama haday noqoto go'aamo iyo qaraarro ay Guddidu keento oo Goluhu meel-mariyo.
- In laga fogaado wax kasta oo arrinta sii fogaynaya, lana dadaalo sidii arrintaa loo damin lahaa. Wa bilaahi tawfiiq.

**Md. Cabdikariin Aadan Cali** *(5min, 40Sec):* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, dhammaantiin waan idin salaamayaa, aad ayaadna ugu mahadsan tihiin fursadda la i siiyey.

Arrintan aynu maanta ka hadlayno ee ah qiimaynta guud ee xaaladda dalku waa arrin aad u mudan. Waxaan hadalkayga ku koobayaa arrimaha siyaasadda, nabad-galyada iyo doorashooyinka, inkasta oo ay jiraan arrimo kale oo badan oo mudan in laga hadlo.

Xaaladda taagan awgeed, marka hore waxaan tacsi tiiraanyo leh u dirayaa dhammaan qaraabadii, qoysaskii iyo ciidankii wixii waxyeello ah soo gaadhay. Sidoo kale, waxaan si gaar ah u tacsiyadaynayaa falalkii ka hor yimid xuquuqda aadanaha ee lagu sameeyey sarkaal ka tirsan ciidamada, arrintaas oo ay dadka oo dhami si weyn u dhibsadeen, isla markaana shuruucdeennu si cad uga soo horjeeddo.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, taariikhda dalka dib uguma noqonayno, balse wixii aynu soo marnay waa la wada ogyahay. Haddii jujuub siyaasadeed, xadgudub xuquuqeed, faragelin sharci iyo sinaan-la'aan ay mar kale dhacaan, waxa ka dhalan kara waxyaabo aan dalka u roonayn.

Arrimaha amni-darrada ah ee hubka la isku qaatay waxay ka socdaan Laascaanood iyo Bariga, sidoo kalena waxaa hadda ku soo biiray Buurta Gacan-Libaax oo caasimadda Hargeysa u jirta masaafo yar.

Waxaan soo jeedinayaa in si niyad-sami, masuuliyad, walaaltinimo iyo muslimnimo ku dheehan tahay aynu ugu wada guntanno xalinta arrintan, kuna qancino dhinacyada is-hor-fadhiya, Madaxweynaha iyo Xukuumaddana ay dib uga fadhiistaan habka hadda loo wajahayo.

Sidoo kale, waa in aynu si dhab ah u fahannaa in siyaasadu aanay ahayn qabiil, nacayb ama aflagaaddo, balse ay tahay mas'uuliyad qaran oo u baahan bisayl iyo wada-jir.

Ugu dambayn, dalka waxa uu ku jiraa khatar gudaha iyo dibaddaba ah, waxaana loo baahan yahay in aynu wada jir u badbaadino, kana gaabsanno wax kasta oo khilaaf iyo burbur keenaya.

**Md. Abiibakar Siciid Cali** *(4min, 55Sec):*– Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, Marwo iyo Mudanayaal, bahda Saxaafadda iyo shaqaalaha Golahaba; ASC.

Mudane Guddoomiye, aniga oo ka faa'iidaysanaya guddidii aan ka midka ahaa ee arrintan Buurta u baxday, marka hore waxaan tacsi u dirayaa Qaranka iyo qoysaskii ay ka baxeen ciidamadii ku geeriyooday dhacdadii dhacday. Ilaahayna waxaan uga rajaynayaa inuu naxariistiisa Janno ka waraabiyo.

Mudane Guddoomiye, arrintani laba arrimood ayay daarantahay: arrin amni iyo arrin siyaasadeed. Haddii aynu dib u noqonno waxyaabaha aasaaska u ah horumarka, wax-qabadka iyo hawl kasta oo la qabanayo, waxa saldhig u ah in marka hore la helo amni iyo xasilooni. Sida uu Sheekh Axmed Dayib inoogu furay aayaddii Quraanka ahayd ee tilmaamaysay amniga, sidaa awgeed marka amni la helo ayaa laga wada hadli karaa wax kasta oo kale.

Mudane Guddoomiye, guddidayadu hawlo badan ayay soo qabatay, halka wax inala gaadheenna waynu ognahay. Aniga oo taas ka faa'iidaysanaya, waxaan qabaa in arrintani aanay u baahnayn canaan, canbaarayn iyo hadal kale; balse ay u baahan tahay ficil, dhaqaaq iyo wax-qabad.

Sidaa darteed, arrintan waxa wax lagaga qaban karaa oo keliya in si qaranimo leh loo dhaqaaqo. Waxaanan soo jeedinayaa:

• In arrintan la qarameeyo, isla markaana aanay ku koobnaan Golahan oo keliya, balse la soo xulo qaybaha kala duwan ee bulshada, sida salaadiinta, waxgaradka, culimada iyo Golaha Guurtida.
• Dhibaatada keentay arrintan (root cause) waa arrimaha doorashooyinka, kuwaas oo u baahan in si qaran loo wajaho, ha noqoto wax-ka-beddel ama is-afgarad.
• Mudane Guddoomiye, waa in hawluhu sida ay u kala horreeyaan loo galaa, nimanka buurta saaran la soo dajiyaa, si arrimaha kale si amni ah loogu galo.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan ku soo gabagabaynayaa in arrintani aanay ahayn wax la sheekeeyo ama la daawado; waa arrin halisteeda iyo khatarteeda leh. Sidaa awgeed, waxaan u soo jeedinayaa cid kasta in arrintan madaxa kor loogu qaado oo meel looga soo wada jeesto. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac** *(6min, 14Sec):*– Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, bahda Saxaafadda iyo shaqaalaha Golahaba; ASC.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, marka hore aynu Ilaahay ka cabsanno, Subxaanahu wa Tacaalaa, Nabi Muxamedna (NNKH) aynu ku sallino.

Ugu horrayn, waxaan soo jeedinayaa in aynu iska ilaalinno hadallada ku salaysan caadifad, maadaama aynu nahay masuuliyiintii ay ummadda Somaliland soo doorATAY. Waxa habboon in dhammaanteenba aynu ka shaqayno wanaagga dalka iyo diinta, sidii aynu ugu dhaaranay ee aynu Kitaabka Quraanka ku marnay. Sidoo kale, yaynaan noqon kuwo caadifad iyo kicin ummadeed abuura. Mudanayaal, waynu ognahay wixii ka dhacay Laascaanood iyo waxa hadda ka socda Buurta Gacan-Libaax.

Waxaan halkan tacsi uga dirayaa dhalinyaradii 11-ka Sebtembar lagu laayay mudaharaadadii nabadda ahaa ee ka dhacay dalka, kuwaas oo aanay jirin cid si ku filan uga tacsiyadaysay, lagana doodin fadhi sidan oo kale ah. Sidoo kale, waxaan tacsi u dirayaa askartii lagu laayay Buurta Gacan-Libaax, anigoo qaba in ay ahayd wax laga baaqsan kari lahaa.

Waxaan sidoo kale aad iyo aad uga xumahay ninkii sarkaalka ahaa ee si foosha xun oo waxshi-nimo ah loola dhaqmay; arrintaasna raalli kama nihin, cidii falkaas geysataynA waa in tallaabo cad laga qaadaa.

Arrinta xaaladda dalku maanta uma baahna hadal uun ama qaboojiye hoostiis la fadhiisto; balse waxay u baahan tahay in tallaabo cad la qaado, annagoo og halka ay sartu ka qudhuntay. Waxa arrintan keenay waa xaalad siyaasadeed oo jirtay labadii sano ee aynu Golahan joogney, iyadoo dano shakhsiyeed oo iska soo horjeeda iyo kuraas la isku haysto lagu kala adeegayay. Taasi looma baahna; waa in qofka qaldan la qabtaa, laguna yidhaahdaa wuu qaldan yahay. Mana aha in aynu runta ka gabanno, waayo waxa keenaya arrintan waa arrimaha doorashooyinka oo aynu marar badan ku kala bixi jirnay tanaasul iyo wada-hadal.

Aad iyo aad ayaan uga xumahay hadal dhawaan ka soo yeedhay Guddoomiyaha Golaha Guurtida oo ahaa “waa beel iyo intii kale ee Somaliland”, maadaama uu ahaa ninkii inoogu sarreeyay ee laga filayay inuu arrintan gacanta inoogu qabto; hadalkaasina kicin ayuu ahaa.

Qodobkayga ugu dambeeya, waxaan u soo jeedinayaa Xukuumadda in la joojiyo ciidammada buurta lagu sii gurayo. Waa in la joojiyaa, waayo haddii qori qori laga

horgeeyo wax wanaag ah kama imanayaan; waa dhimasho kale iyo khasaare. Taasi mid loo baahan yahay ma aha. Inamada buurta ku jirana waxaan leeyahay: wanaag laguma gaadho xabbad ee joojiya. Odayaasha, cuqaasha iyo waxgaradkana waxa la gudboon in ay maanta fadhiga ka kacaan. Annaga oo Gole ahna, waxaan u soo jeedinayaa in aynu annagu ugu horreyn tallaabo qaadno, maadaama aynu nahay dadkii la soo doortay.

Xukuumadda waxaan u soo jeedinayaa in ay arrinta dejiso. Arrin kale oo aan ka hadlayaa waa dhacdadii shalay, sida aad warbaahinta ku aragteen, ee magaalada Burco lagaga afduubtay ilmo, taas oo ah arrin aad iyo aad u naxdin badan. Haddii magaalo dhexdeeda la iska afduubanayo, waa in cidii falkaas geysatay sharci la hor keenaa, nabad-gelyadana si buuxda looga shaqeeyaa. ASC.

Guddoomiye Faratoon; Mudanayaal, sida ay xildhibaano badani ka dhawaajiyeen, waxa loo baahan yahay waa xal. Waxa loo baahan yahay in aynu soo saarno wax ay dadku ku bogsadaan. Sidoo kale, waxaan mudanayaasha u soo jeedinayaa in waxa aynu doonayno uu yahay xal, sidaa awgeed yaan la samayn wax kasta oo xaaladda sii kicinaya ama wax ku sii kordhinaya dhibaatada taagan.

**Md. Xuseen Ismacil Jaamac (Budul)** *(7min, 03Sec):–* Raxmaani Raxiim, Mudane Guddoomiye waad mahadsan tahay. Guddoomiyaha iyo Mudanayaasha waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka; ASC.

Arrinta maanta aynu ka hadlayno ee ah xaaladda uu dalku ku sugan yahay, aad ayaan u soo koobayaa. Mudane Guddoomiye, waxaan ka hadlayaa saddex qodob oo kooban oo soo-jeedin ah.

Xaaladda wadankeenu uu ku sugan yahay waynu ka warhaynaa, mushkiladda Gobolka Soolna waynu ka dharagsanahay toddobadii bilood ee ina dhaafay siduu ahaa; in ay goob colaadeed noqotay, in dadkii shacabka ahaa qaxeen, in hantidii burburtay, isla markaana uu dagaalkii weli socdo. Sidoo kale, waynu ognahay in arrimo maamul iyo kuwo kale faraha kula jiraan. Sidaa awgeed, arrinta Sool ee damqashada leh, waxaan ku soo koobayaa warbixintii hore ee Golahani ka diyaariyey iyo qaraarkii ka soo baxay ee ahaa in daba-gal lagu sameeyo; waxaana soo jeedinayaa in ficil loo beddelo. Golaha waan u xasuusinayaa in wixii Golaha ka soo baxa ay waajib tahay in la daba-galo; haddii kale waxay u ekaanaysaa dad meel iska fadhiya, iska hadlaya, balse aan waxqabad lahayn.

Labadii sano ee Golahani joogay, muranadii ugu badnaa waxay ahaayeen arrimaha doorashooyinka. Tusaale ahaan, arrinta Xeer Lr. 14 gacan-ka-hadal ayaa ka dhacay, xaaladdeennuna waxay ahayd mid midkiiba xaaladdiisa ku taagan yahay. Taasi waa tan keentay dayaca ka dhacay Gobolka Sool. Sidoo kale, ciidammada buurta galay waxay ka dhasheen murannadii siyaasadeed ee soo jiitamayay muddo, kuwaas oo ilaa hadda taagan.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa in arrimahan aanay noqon dhaqan soo noqnoqda, maadaama ay mar kasta oo doorashada madaxtooyadu soo dhowaato soo baxaan. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in Golahani ka soo saaro qaraar cad oo lagu xallinayo murannada siyaasadeed ee ku wajahan doorashada madaxtooyada, qaraarkaasna uu noqdo mid maalgelin iyo xoojin ku sameeya xeerarka dalka u yaalla; ha noqoto Dastuurka ama xeerarka kale ee doorashooyinka, isla markaana noqda mid kaabaya.

Waxaan sidoo kale soo jeedinayaa in Guddida Doorashooyinku aanay samayn jadwal doorasho iyaga oo aan samayn isu-soo-dhowayn iyo wadahadal ay la yeeshaan dhammaan dhinacyada ku tartamaya doorashooyinka. Halkan waxa iiga muuqata dayac ay sameeyeen xubnaha Komishanka Doorashooyinka. Sidaa awgeed, Golahani waa inuu sameeyaa guddi gaar ah oo la shaqaysa Guddida Doorashooyinka, si ay u fududeeyaan isu-soo-dhowaanshaha dhinacyada tartanka ku jira.

Mudane Guddoomiye, guddidii is-xilqaantay ee arrinta Buurta Gacan-Libaax ku jirtay, waxaan soo jeedinayaa in ay warbixin Golaha u soo celiyaan, si Golaha Weynuhu go'aan uga gaadho arrimahaas.

Mudane Guddoomiye, halkan waxaan ku hayaa tiro dad ah oo liisaskooda la ii soo gudbiyay, kuwaas oo ka cabanaya nidaamka shaqo-qorista xafiisyada dawladda. Waxa jira dhalinyaro jaamacadaha ka soo baxday oo u tartamay xilal ka bannaanaa xafiisyada dawladda, kuwaas oo markii ay ku guulaysteen haddana shaqooyinkii la gacan-bidixeeyay. Arrintaasi waxay keeni kartaa khalkhal la mid ah kan buuraha ka jira, waxay dhalin kartaa cadaalad-darro, waxayna abuuri kartaa khilaafaad kale oo sii baaha. Sidaa awgeed, Golahani waa inuu indho gaar ah ku eego nidaamka shaqo-qorista xafiisyada dawladda.

Ciidammada buurta Gacan-Libaax galay, anigu waxaan qabaa in ay tahay arrinta ugu sahlan ee maanta wax laga qaban karo marka loo eego xaaladaha kale ee dalka ka jira; ha noqoto Gobolka Sool, arrimaha dhaqaale, doorashooyinka ama siyaasadda dibadda.

Waxaanan soo jeedinayaa in sida ugu dhakhsaha badan loogu hawl-galo xalinta arrintan, sida uu xildhibaan Cabdiraxmaan sheegay, isla markaana Goluhu u saaro guddi cusub ama uu kaabo guddidii hore. Maantaba odayaashii dhaqanka ayaa u baxay buurta, waana in arrintaas si degdeg ah loo galaa. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tahay, Mudane Guddoomiye.

**Md. Cali Jaamac Carraale (Cali-Qaran)** ***(6min, 52Sec):–*** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Dhammaan Mudanayaasha Golaha, Shaqaalaha Weynaha Golaha, Saxaafadda Madaxa-bannaan iyo Saxaafadda Golaha, waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka; Assalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, anigoo fursaddan ka faa'iidaysanaya, waxaan tacsi u dirayaa ciidankii Qaranka ee qalabka siday ee waxyeelladu ka soo gaadhay Buurta Gacan-Libaax; qaarna naftooda waayeen, qaarna cusbitaallada u jiifaan. Iyaga iyo qoysaskoodaba, intii dhimatay Ilaahay ha ka siiyo samir iyo iimaan, intii dhaawacanna Ilaahay ha booga-dhayo.

Runtii, falkaasi wuxuu ahaa fal Qaranka boog ku ah, waana mid dhammaanteen dusha inoo saaran damqashadiisu. Waxaan si gaar ah uga xumahay sarkaalkii ka mid ahaa ciidanka ee si arxan-darro ah loola dhaqmay, karaamadiisiina lagu tuntay isagoo mayd ah.

Cid kasta oo ku doodaysa inay falkaas geysatay ama difaacaysa, waxaan leeyahay: dadkaasi waa dad aan Somaliland meelna uga damqanayn, waana falaago; cid kasta oo Somaliland ka mid ahina sidaas ayay u taqaannaa.

Waxa ina wada sugaya waa sidii aynu Somaliland 32 sano nabad ugu soo naaloonaynay, uguna higsanaynay inay ka mid noqoto dawladaha la ictiraafay. Waxaan dareemayaa in duullaan shisheeye oo fikir ah uu jiro, isla markaana dad aan masuuliyad wadaniyadeed lahayn, oo dibadda jooga, ay door ku leeyihiin dabka la hurinayo.

Waxaan u digayaa dadka qurba-joogga ah ee dabka ka soo hurinaya dalal shisheeye in Somaliland aanay ku dumin karin hadalkooda. Waxaan jecelahay in aynu meel uga soo wada jeesanno, annagoo ka duulayna 32-ka sano ee ay Somaliland soo martay, kana fogaanayna in lagu tuuro god madow.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan la qabaa mudanayaashii iga horreeyay. Waxaan bogaadinayaa guddidii is-xilqaantay ee hawsha Gacan-Libaax. Waxaanan ku talinayaa, Mudane Guddoomiye, in guddi gaar ah loo saaro hawshaas si ay uga qayb qaataan xalinteeda.

Ciidanka Qaranku qolo ma aha, qabiilna ma aha. Maalmihii u dambeeyay, waxa jiray masuuliyiin xisbiyo ka tirsan oo ciidanka u adeegsaday dano gaar ah. Waxaan leenahay: Ciidanka Qaranku ma aha mid Madaxweyne gaar u ah, mana aha mid Golaha Wakiillada u gaar ah; Ciidanka Qaranka waxa leh Somaliland, waxayna u dhintaan dadkooda, u dhaawacmaan dadkooda. Xaq ayayna inoogu leeyihiin in aynu ku garab istaagno hawlaha adag ee ay hayaan.

Hawsha Gacan-Libaax waa hawl dhammaanteen inaga wada saaran. Inamada buurta saaran, inta halkan wada fadhida ayaa u wada xilsaarran. Waxaan jecelahay inaynu dhammaanteen isu-guntanno, cidna aan eegin, si hawshaas loo soo afjaro, Insha Allaah.

Arrimaha doorashooyinka, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, Somaliland waxay halka ay maanta joogto ku gaadhay doorashooyin. Kursiga aynu ku

fadhinnaa waa doorasho, doorashana waanu kaga tegaynaa. Madaxweynaha Qarankuna kursiga waa ku fadhiyaa doorasho, wuuna kaga tegayaa doorasho.

Waxaan jecelahay wixii doorashooyin u xaniban ee Golahan doorkiisa ah in aynu fududayno, doorkeenana qaadanno. Ninka kursi doonayaa ma aha inuu Somaliland ku handado dumin, ninka kursiga ku fadhiyaana ma aha inuu yidhaahdo Somaliland ayaan u duminayaa.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan rajaynayaa inaynu door muhiim ah ka qaadanno arrinta Buurta Gacan-Libaax. Qodob kale oo aan raacinayo ayaa ah Golayaasha Deegaanka; waxay u dabran yihiin warqad, hase yeeshee waxay xaq u leeyihiin inay is doortaan qofkii ay rabaan. Xeer Lr. 23 si sharci-darro ah ayaa loogu joojiyay arrintan. Qodobka 70aad, faqraddiisa 2aad, Mudanayaasha Golaha Deegaankuna waxay xaq u leeyihiin inay doortaan cidda ay doonayaan. Sidaa awgeed, Golaha waxaan ka codsanayaa in qaraar gole lagu soo saaro, warqaddaas dabarka laga saaro, sharci-darradana meesha laga saaro.

**Md. Cabdikarin Maxamed Muxumud** *(8min, 44Sec):*– Ugu horrayn Ilaahay baa mahadleh. Mar labaadna, Assalaamu calaykum Shir-guddoonka, Xildhibaannada Golaha Wakiillada, Saxaafadda iyo Shaqaalaha Golaha.

Marka hore, waxaan halkan tacsi la wadaagayaa dhammaan saraakiishii iyo ciidamadii ka tirsanaa Booliska Somaliland ee ku dhintay Buurta Gacan-Libaax. Tacsi tiiraanyo leh ayaan u diraynaa qoysaskii ay ka baxeen.

Mar labaad, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan halkan kalmad dardaaran ah ugu jeedinayaa saxaafadda joogta Golaha, gaar ahaan saxaafadda madaxa-bannaan. Waynu ognahay kaalinta ay saxaafaddu ku leedahay bulshada; mihnadda saxaafadeed ee aad haysaan waa inaad bulshada ugu adeegtaan si qaranimo leh. Had iyo jeer, wixii dadka kala fogaynaya waa inaad ka dhawrsataan, ha ahaato hawl Golaha ka socota ama hawl ka baxsanba.

Sidoo kale, Mudanayaasha doodda ka qayb-qaadanaya, hadday tahay dooddan xaaladda guud ee dalka ama dood kale mid kasta, Mudanuhu maadaama uu xil qaran hayo, erayada aan munaasibka ahayn ee dooda sii kala fogaynaya waa in laga fogaadaa, waayo taasi waxay sii hurinaysaa xaaladda oo dab lagu sii shidayaa.

Intaa ka dib, waxaan u gudbayaa nuxurka dooddayda, oo ah xaaladda maanta ka taagan Somaliland. Dadka reer Somaliland, guddo iyo dibadba, waxay si dhow ula socdaan xaaladda ka taagan Buurta Gacan-Libaax iyo inamada jabhadaha ah ee buurtaas galay. Waynu ka warqabnaa in xaaladdaasi salka ku hayso khilaafka siyaasadeed ee la isku hayo, gaar ahaan khilaafka doorashooyinka, kaas oo isna salka ku haya xeerarka la xidhiidha doorashooyinka.

Runtii, Golahani waa Golaha ugu horreeya ee masuuliyadda saaran tahay in la buuxiyo gal-daloolooyinka ka iman kara xeerarka doorashooyinka iyo xeerarka kale ee dalka u yaalla. Taasi waa masuuliyadda koowaad ee aynu u taaganahay. Sidaa awgeed, innaga oo aan dood kale iyo hawlo kale ku mashquulin, waa in aynu mar walba istaagno buuxinta qabyooyinka sharci iyo hawlaha inoo yaalla, si aanan u iman gal-daloolo sharci oo lagu murmo, kuna dambaysa in xaaladdu halka ay maanta joogto gaadho. Taasi waa masuuliyadda koowaad ee Gole ahaan inaga saaran, maadaama aynu nahay Golaha Wakiillada ee codka ummadda haya.

Arrinta labaad, xaaladda is-maandhaafka ah ee halkaas ina soo gaadhsiisay, murankuna ilaa maanta ka taagan yahay, waxay u baahan tahay in laga gaadho xal siyaasadeed. Waa in miiska wada-hadalka la iskugu yimaado, dadka ku kala aragtida duwani aanay mid waliba halkiisa ku adkaysan, balse ay u diyaar garoobaan sidii qaranimada, jiritaanka iyo nabadgelyada dalka loo ilaalin lahaa, iyaga oo ahmiyadda koowaad siinaya danta guud.

Haddii muranka siyaasadeed iyo khilaafka la sii fogeeyo, xaalad aynaan saadaalin karin ayaa ka dhalan karta. Ifafaalaheeda iyo hordhaceedaba maanta way muuqdaan; haddii aynu dhexdeena kala qaybsanno, Somaliland cid kasta oo wax u dhimaysa ayay u fududaanaysaa, gacmo shisheeyena way soo geli karaan.

Sidaa darteed, taladaydu waxay tahay in xukuumadda iyo xisbiyada mucaaradku ay miiska wada-hadalka iskugu yimaadaan, ahmiyadda koowaadna la siiyo sidii xal looga gaadhi lahaa arrintan. Qof waliba waa inuu miiska keenaa waxa uu jecel yahay, balse lagu saleeyaa waxa dalka u dan ah, nabadgelyadiisa, wadajirkiisa iyo wada-lahaanshihiisa xoojinaya. Dhinacyada fikirka ku kala aragtida duwani waa inay u diyaar garoobaan tanaasul, waayo waa waajib qaran oo inaga wada saaran ilaalinta jiritaanka dalka iyo midnimadiisa.

Masuuliyadda koowaad ee hawshan waxay saaran tahay hoggaamiyeyaasha ugu sarreeya: xukuumadda oo uu hoggaaminayo Madaxweynaha, mucaaradkana oo ay hoggaaminayaan musharraxiinta ugu sarreeya ee xisbiyada Waddani iyo UCID. Waxaan leenahay: idinku waxaad tihiin odayaashii Qaranka, waxa laydinka sugayaa xal siyaasadeed, wada-hadal iyo is-qancin. Waxa laydinka sugayaa in la joojiyo kala-qaybsanaanta maanta keentay in dhalinyaro qaarkood jabhad noqdaan, qori qaataan, kuna laayaan ciidamadii ammaankooda ilaalinayay.

Intaanay xaaladdu faraha ka bixin, waa in wada-hadal la furaa, miiska wada-hadalkana la iskugu yimaadaa, danta ummaddana loo tanaasulaa. Tanaasulkaasna ha noqdo mid lagu xoojinayo jiritaanka, nabadgelyada iyo dawladnimada Somaliland. Dadkeennu maanta werwer badan ayay qabaan, dad badan oo jilicsanna waxay ka sugayaan hoggaaminta dalka xal iyo dejin.

Ugu dambayn, waxaan baaq u dirayaa bahda dhaqanka, salaadiinta, waxgaradka iyo haldoorka Somaliland, in ay ka qayb qaataan sidii xal looga gaadhi lahaa khilaafka siyaasadeed ee doorashooyinka la xidhiidha, loona soo dhawayn lahaa dhinacyada is haya. Waa in miiska wada-hadalka la iskugu yimaadaa, xalna laga gaadhaa, si nabadgelyada iyo wada-noolaanshaha dalka loo ilaaliyo, loogana hor istaago cadowga Somaliland ee dibadda jooga inay ka faa'iidaystaan kala-qaybsanaanteenna.

Aan ka fikirno mustaqbalka carruurteena, deggenaanshaha dalkeena iyo horumarkiisa. Taasna saldhig u ah nabad; nabadduna saldhig u tahay deggenaanshaha siyaasadeed. Sidaa darteed, doorashooyinka waa in laga heshiiyo, xalna laga gaadho, wixii danta Qaranka ku jirana la qaato. Yaynaan noqon "mindi mindi ku taag" iyo "taydu ha socoto, taadu yaanay socon"; balse aan is-qancinno, isu-tanaasulno, kuna kulanno walaaltinimo, qaranimo, is-jacayl iyo wada-lahaansho.

Golaha Wakiillada ee aan ka tirsanahay, waxaan jeclaan lahaa inay had iyo jeer diiradda saaraan dhamaystirka xeerarka qabyada ah ee dalka ka jira, ka shaqaysiintooda, la xisaabtankooda, iyo gudashada masuuliyadda naloo doortay si daacadnimo iyo hufnaan leh. Waa inaan ka fogaannaa ku milanka murannada siyaasadeed ee xisbiyadu hoggaaminayaan, oo aragtideenna ku saleeynaa buuxinta qabyooyinka sharci ee dalka. Taasi waxay xoojinaysaa nidaamka dawladnimada, nidaamka isla xisaabtanka, iyo wada-shaqaynta hay'adaha dawladda.

Ugu dambayn, waxaan mar kale ugu baaqayaa cid kasta oo garanaysa qiimaha nabadgelyada—ganacsatada, bahda dhaqanka, salaadiinta, cuqaasha, iyo dhammaan dhinacyada siyaasadda ku kala duwan—in ay ka wada shaqeeyaan nabadgelyada, miiska wada-hadalkana la iskugu yimaado, jiritaanka Somalilandna loo wada tanaasulo.

**Md. Axmed Xasan Cali (Casoowe)** *(6 Min, 34Sec)* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Markii aan maanta ajandaha arkay in lagu qoray qiimaynta xaaladda dalka, waxa ii muuqatay in xaaladda ugu weyn ee maanta taagan tahay dagaalka ka socda Laascaanood. Hase yeeshee, xildhibaanadii hadashay badankoodu waxay diiradda saareen arrinta Buurta Gacan-Libaax, taas oo muujinaysa in xaaladdii markii hore hal meel ku koobnayd ay hadda laba jiho u kala baxday.

Marka hore, waxaan tacsi u dirayaa dadkii rayidka ahaa ee ku waxyeelloobay dagaallada ka socda Laascaanood, gaar ahaan dadkii shalay madaafiicdu ku dishay. Waxaa ka mid ahaa nin oday ah oo la odhan jiray Jaamac Maxamed Mire, oo Digaale lagu naanaysi jiray, ahaa ganacsade weyn, oday diinta ku suntan, oo ay yaqaannay Soomaalida iyo reer Somalilandba. Isagoo sariirtiisii jiifa, kuna dhow 80 jir, ayaa madfac ku dhacay. Tacsi baan u dirayaa qoyskiisa, Golaha-na waxaan ka codsanayaa in ay tacsi rasmi ah u diraan.

Dagaalka iyo dhibaatada ka taagan Laascaanood khasaare aad iyo aad u weyn bay keeneen. Waxa la maqlayaa dhinacyada dagaallamaya oo marba dhinac sheeganaya guulo, balse aniga iima muuqato guul dhab ah oo halkaas laga gaadhay. Khasaaraha ugu horreeya waxa uu ku dhacay Qaranka Somaliland, waxaana mugdi galay wadajirkii, dhismahii qaranimada iyo jiritaankii ummadda. Khasaaraha labaadna waxa uu si toos ah u gaadhay shacabka reer Laascaanood; in ka badan 200,000 oo qof ayaa guryahoodii ka barakacay, in ka badan 50,000 oo arday ayaa iskuullo ka baxay, maamulka dawladduna waxa uu istaagay inta u dhexaysa Taleex iyo deegaanno kale. Taasi waa khasaare guud oo ku dhacay Somaliland oo dhan.

Waxaan aad ula yaabaa marka ay golayaasha qaranka ka soo baxaan hadallo aad u liita. Maalin dhaweyd, xildhibaan ka tirsan Golaha Guurtida oo ka hadlaya arrinta Gobolka Sool ayaa isagoo qosol iyo jeesjees wata ku sheegay "midho la buufinayo". Sidoo kale, dadka Buurta Gacan-Libaax jooga waxaa lagu tilmaamay ereyo liita. Taasi waa Gole Qaran, hadallada noocaas ahna in la iska dhegeysto iyada oo aan wax jawaab ah laga bixin waxay sii fogaynaysaa kala fogaanshaha bulshada.

Markaan u soo noqdo arrinta nabadgelyada, waxaan ku raacsanahay hadalkii xildhibaan Xuseen. Haddii aanay cadaalad jirin, nabadgelyo jiri mayso. Culimadii iyo aqoonyahannadii qeexay nabadgelyada waxay yidhaahdeen: nabaddu waxay timaaddaa marka rabshaddu maqnaato oo cadaaladdu jirto. Labadaas arrimood waa kuwo is kaabaya; haddii mid maqnaado, kan kalena ma jiri karo.

Waxaan soo jeedinayaa in Golaha Wakiilladu si dhab ah u taageero baaqyada nabadeed ee ay soo saareen waxgaradka, culimada Somaliland, dalalka deriska ah iyo Golaha Ammaanka, kuwaas oo ku baaqay in ciidamada laga fogeeyo meelaha rayidka ah, rasaastana laga joojiyo, kadibna la furo waddo wada-hadal. Arrintaas waa in lagu daraa qaraarka ka soo bixi doona dooddan maanta.

Arrinta Buurta Gacan-Libaax, waa la og yahay in marka siyaasadda laga quusto ay yimaaddaan xaalado aan la filayn. Si kaftan ah, balse fariin xambaarsan, waxaan xusuusinayaa sheeko hore oo la xidhiidha xilligii dawladdii Maxamed Siyaad, halkaas oo la sheegay in dadku hal arrin oo kali ah ka cabanayeen. Maanta, dadka reer Somaliland waxay aad uga hadlaan koox la yidhaahdo "Jeegaan". Haddii arrintaas si cadaalad ah loo wajaho, waxaan rumaysanahay in arrimo badan ay hagaagi doonaan.

**Md. Barkhad Jaamac Batuun** *(7Min, 40Sec)*:- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, anigu hadalkayga waan koobinayaa si ay mudanayaal kale fursad u helaan. Intii mudanayaal ah ee hadashay waan qadarinayaa, balse hadalladeenna intooda badan waxay u ekaayeen cabasho, canaan iyo eedayn, halkii ay ka ahaan lahaayeen falanqayn qoto dheer oo xalka u jeedda.

Doorka Goluhu waa mid ka ballaadhan sida aynu hadda u hadlayno. Waxaa nala filayaa hannaan siyaasadeed, aragti qodobaysan iyo hoggaan mas'uuliyadi ku dheehan tahay. Doorkeenna dastuuriga ah waa mid cad; xaaladda maanta dalku galay, cidda laga sugayaa xalkeedu waa innaga.

Waxaan qabaa in shaadhadhka xisbiyada, ururrada iyo kala qoqobka xaafadaha laga dhaafo gudaha Golaha. Waxaa inoo yaalla saddex waajib oo waaweyn: amniga dalka, doorashooyinka dalka, iyo metelaadda codka shacabka ina soo doortay. Dadka caqliga leh, salaadiinta, culimada iyo shacabka rajo ka qaba Somaliland, dhammaantood waxay ina leeyihiin: maanta waa maalintiinii aad dadka badbaadin lahaydeen.

Aniga qudhaydu waxaan ka mid ahaa guddidii is-xilqaantay ee Guddoomiyuhu hoggaaminayay. Waxaan aragnay dhinacyo badan; Madaxweynaha, xisbiyada, iyo hoggaamiyeyaasha kale dhammaantood waxay muujiyeen niyad-sami iyo jaceyl ay u qabaan badbaadada Somaliland. Taasi waxay inoo caddaynaysaa in xal la gaadhi karo.

Doorka ugu weyn ee inoo yaalla waa sharci-dejinta. Xaaladdan maanta ina soo gaadhsiisay waxay u baahan tahay xal sharci ah iyo qaraar masiiri ah oo dalka badbaadiya. Arrinta Laascaanood waa masiibo qaran, dhinac kasta ha ka timaaddee. Haddii aynu iska indho-tirno oo aynu ka aamusi weyno, cidna xil ma hayn karto, hanaanka dawladnimaduna wuu burburayaa.

Waxyaabaha ugu murugada badan waa heerka ay gaadhay kala nacaybka ummadda. Dadka Buurta saaran iyo askarta la dhibaateynayo dhammaantood waa muwaadiniin Somaliland ah. In askari calanka iyo dirayska Qaranka xiran la ceebeeyo, la aflagaadeeyo ama lagu xadgudbo waa wax damiirku diidayo.

Sidaas darteed, yaynaan is-aflagaadayn, yaynaan xan-xan gelin, yaynaan cidna quudhsan. Aynu u jeedsanno sida aynu dadka isugu soo dhoweyn lahayn, xal waara u heli lahayn, kana hormarin lahayn danta Qaranka wixii xisbi, urur ama dano gaar ah ah.

Maanta dan ka weyn kulmiye, wadani ama xisbi kale ma taallo; waxa taalla waa Somaliland, amnigeeda, dadkeeda iyo mustaqbalkeeda.

Guddoomiye, waxaan qabaa in qof walba masuuliyad qaran ka saaran tahay. Haddii mid walba halkan ku yimaaddo isaga oo xiran shaadh Kulmiye, midna shaadh UCID, midna shaadh urur kale, taasi waxay noqonaysaa baabba'eennii ugu horreeyay.

Haddii aan arrinta si qoto dheer u eegno, waxa inagu dhacay waa khilaaf siyaasadeed oo taladii ka saaray dad aan dalka u dhaaran, taasina waxay keentay rabshado maanta heerkan maraya, kuwaas oo khatar ku ah in ay gaadhaan gobollo

kale, dhiigna maalin kasta daato. Sidaas awgeed, waa in xukuumadda la qabtaa, mucaaradkana la qabtaa, xalkuna waa in aynu isu soo dhawaanno, adiguna Guddoomiye aad hoggaan nagu samayso.

Ma jiro Gole Guurti oo maanta dalka lagu hallayn karo, mana jiro dhaqan mideysan oo lagu hallayn karo; dhaqankii badankiisu wuxuu noqday kuwo la safan xisbiyo. Sidaas darteed, yaynaan wareerin. Kulmiye ha xidho calanka Somaliland, Waddanina ha xidho calanka Somaliland. Haddii aynaan runta isu sheegin, aynaan odayaasha siyaasadda isku haya isu soo dhawayn, oo aynaan keenin xeer doorasho oo dalka badbaadiya, waa hubanti in aynaan xildhibaan ahaan doonin, dalkuna jiri doonin, nabadgelyadiisuna sii dhaawacmi doonto.

Anigu, anigoo ku hadlaya dareen iyo masuuliyad qaran, waxaan leeyahay badbaadada Somaliland maanta waxay ku jirtaa gacmaheenna. Arrintani waxay ka bilaabantay xal siyaasadeed, Guddoomiye, adiguna oday noo noqo; ciddii aad dooranayso dooro, Golaha u hag sidii uu dadka u badbaadin lahaa. Asalaamu calaykum.

**Md. Xasan Saleebaan Dhuxul (Laab-saalax)** (3min, 02sec):- Ilaahay baa keligii mahad leh. Mudane Guddoomiye, labadii sano ee Golahani jiray, marar badan ayaan ka hadalnay xaaladda guud ee dalka. Markii aynaan ka hadlin, xaaladdu ayay inala hadashay. Sidaas darteed, maanta ka hadalkeedu waa arrin khasab ah.

Waxaan taabanayaa saddex qodob: nabadgelyada, khilaafaadka doorashooyinka, iyo xeerarka qabyada ah. Khilaafaadka doorashooyinka, is-diidooyinka iyo murannada siyaasadeed waxay keeneen kala qaybsanaan bulsho. Kala duwanaanshaha aragtiyaha waa wax dabiici ah, balse in khilaafka la xallin waayo muddo laba sano ah waa dhaliil weyn, taas oo muujinaysa in ay go'een xadhkihii tanaasulka, wada-tashiga iyo is-xakamaynta.

Umaduhu sida ay u yaraystaan khilaafka waxay ku xidhan tahay sida ay ugu dhaqmaan shuruucda ay dhigteen. Khilaafka siyaasadeed ee dalkeenna yaalla waxa daba socda is-afgarad la'aan, taasina waxay muujinaysaa in Xeerarka Doorashooyinku qabyo yihiin. Waxaan doonaynaa in khilaafka doorashooyinku dhammaado, balse xal ma iman karo inta aan la saxin xeerarkaas.

Nabadgelyada, Laascaanood oo ahayd meelaha ugu amniga wanaagsan Somaliland, waxa soo gaadhay nabar weyn. Taasi waxay dhaawacday sumcaddii iyo amnigii dalka. Sidaas darteed, Goluhu waa inuu guto waajibaadkiisa dastuuriga ah. Qaraarro hore oo Goluhu soo saaray, sida dib-u-eegista xeerarka nabadgelyada, argagixisada, anshaxa, iyo arrimaha booliska iyo mudaharaadyada, haddii la hirgelin lahaa, wax badan baa la xallin lahaa.

Mudane Guddoomiye, Wasiirka Amniga in Golaha loo yeedho waa arrin muhiim ah.

**Md Axmed Mxamed Hure** (4min, 42sec): - Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeen, Marwooyin, Mudanayaal, bahda saxaafadda iyo shacabweynaha Somaliland, Asalaamu calaykum.

Marka hore, waxaan tacsi u dirayaa dhammaan Ciidanka Qaranka ee sannadkii u dambeeyay ku shahiiday difaaca dalka, gaar ahaan kuwii ku dhintay Laascaanood, kuwii ku dhaawacmay, iyo kuwii shalay ku shahiiday Buurta Gacan-Libaax. Sidoo kale, waxaan tacsiyaynayaa cid kasta oo xabbad sharci-darro ah ku geeriyootay, iyo kuwii ku dhintay mudaharaadyadii nabadeed.

Xaaladda dalku maanta waa mid adag. Ma aha maalintii quruxda, nabadda iyo dimuqraadiyadda aynu ku faani jirnay. Dhibaatooyin amni-darro ayaa ka jira gobollo badan; Laascaanood, Togdheer iyo Saaxil. Labadii shay ee aynu ku faani jirnay amniga iyo dimuqraadiyadda, labaduba maanta way dhaawacmeen.

Masuuliyadda amniga waxay saaran tahay xukuumadda, Madaxweynaha iyo wasiirradiisa. Goluhuna waa inuu la xisaabtamaa xukuumadda wixii ka dhacay Laascaanood iyo wixii maanta taagan. Dagaalka Laascaanood waxa la saadaalinayay inuu fidiyo, haddii aan wax laga qaban, meelo kalena wuu gaadhi karaa. Sidaas darteed, dadaallada nabadeed iyo guddiyadii is-xilqaantay waa in Goluhu garab istaago.

Guddoomiye, guddiyadii aad hor kacaysay waanu ku mahadinaynaa, balse waxaan idinka sugaynaa in wixii talo iyo natiijo ah ee aad soo ururisay Golaha loo soo bandhigo. Golaha Wakiilladu maanta waa hay'adda keliya ee caafimaad qabta ee la sugayo. Sidaa darteed, Guddoomiye, inoo kac; xildhibaanada qaar waa is-xilqaameen, kuwo kalena waad magacaabi kartaa. Halkii aad arrinta gaadhsiisayna aynu ka dhaqaajino, si aynu nabadda u soo celinno

**Md: Fu'aad Axmed Diiriye** *(5min, 45Sec): -* Mudane Guddoomiye, waad mahadsan tahay. Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, bahda saxaafadda iyo shaqaalaha Golaha, Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Waxaan mar labaad tacsi tiiraanyo leh u dirayaa qoysaskii, Ciidanka Booliska iyo guud ahaan Qaranka, askartii lagu laayay deegaanka Go'da-yar. Sidoo kale, waxaan tacsiyadaynayaa dhammaan dadkii ku naf waayay colaadaha maanta taagan, waxaanan Ilaahay ka baryayaa in dhammaantood Janatul-Firdowsa ku abaalmariyo.

Mudanayaal, dalku waxa uu ku jiraa xaalad colaadeed iyo mid siyaasadeed, ha noqoto Laascaanood ama Buurta Gacan-Libaax. Arrinta Laascaanood Gole ahaan guddi gaar ah ayaa loo saaray, Goluhuna bayaan ayuu ka soo saaray, waana mid xafiiska taalla.

Xaaladda maanta taagani waa mid qalafsan, waxaana loo baahan yahay in si taxaddar leh loo wajaho. Waa in cunfiga laga ilaaliyo, indho nabadeed iyo kuwo caafimaad qabana lagu eego. Waa in aan xaaladda lagu sii shubin baasiin, isla markaana aanay noqon “midi midi ku taag”. Anigu waxaan garab taaganahay cid kasta oo xal nabadeed wada, ha noqoto culimo, cuqaal ama golayaal qaran.

Waxaan soo jeedinayaa in guddidii is-xilqaantay ay Golaha warbixin ka siiyaan hawlihii ay qabteen, si Goluhu go’aan uga gaadho in guddi rasmi ah la magacaabayo ama guddidaas la xoojinayo.

Waxaan ku talinayaa in Goluhu qaato calanka nabadda, taladeennuna noqoto mid nabadeed. Marka nabaddu adkaato ayaynu gali karnaa khilaafaadka kale ee siyaasadeed.

Khilaafka siyaasadeed, mudanayaal, wada-hadal wuxuu ku imanayaa nabad, is-fahanna wuxuu ku imanayaa nabad. Inta jabhaddu buurta saaran tahay, taladeennuna buurta ayay saaran tahay. Sidaas darteed, waa in buurta laga soo dajiyaa, arrintana lagu saleeyaa gogol nabadeed, gafafka dhacayana si islaamnimo iyo qaranimo leh looga gudbaa. Arrimaha nabadgelyadana waa in wakhti la siiyaa.

Waxaa loo baahan yahay talo nabadeed, talo walaaltinimo, talo waddaniyadeed, talo qaranimo iyo talo caafimaad qabta.

Waxaan soo jeedinayaa:

- In la mideeyo ergooyinka nabadeed ee gobollada dalka ka hawlgala.
- In taladeenna iyo fikirkeennu isu yimaaddaan si jabhadda buurta looga soo dejiyo loogana xalliyo asalka mushkiladda.
- In wixii khilaaf ah lagu xalliyo Dastuurka iyo Xeerarka dalka, haddii kale xalku meel ka baxsan dalka ayuu inooga imanayaa.

**Md. Mustafe Axmed Cabdilaahi (Khayreeye)** (7Min, 29Sec):- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha Golaha Wakiillada, Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Marka hore, waxaan doodayda ku taageerayaa tacsidii ay dirayeen mudanayaashii iga horreeyay ee loo diray askartii iyo saraakiishii ku geeriyootay falkii ka dhacay Buuraha Gacan-Libaax iyo deegaanka Go’da-yar. Tacsi gaar ah waxaan u dirayaa

sarkaalkii si aan diinta, dhaqanka, bani'aadannimada iyo insaaniyadda toona waafaqsanayn loola dhaqmay. Aad ayaan uga xumahay dhacdadaas fool-xumada leh.

Waxaan mudanayaasha saaxiibbaday ah ku baraarujinayaa in falalka xun ee ay koox samayso, inkasta oo ay qof ama koox ka bilaabmaan, aanay ku koobnaanayn cidda falka gaysatay oo keliya, balse ay saamayn ku yeelan karaan ummadda oo dhan haddii aan go'aan mideysan laga qaadan. Ilaahay ayaa Quraankiisa inoogu digay fidno aan ku koobnaanayn kuwii sameeyay. Innaga oo ah mudanayaal qaran oo dalka laynoogu dhaariyey, masuuliyad baa ina saaran in aanan mar walba ku eegin aragti reer, aragti kooxeed, aragti xisbi ama urur, nooc kasta oo ay tahay.

Qof kasta oo fal dil ama waxyeello geysta, waxaan u aqoonsanaynaa gacan-ku-dhiigle ka hor yimid mabaadi'da diinta, dastuurka iyo bani'aadannimada. Falkaasna si cad ayaan u canbaaraynaynaa, annaga oo u aragna fal budhcadnimo ah oo ka baxsan insaaniyadda.

Waxaan rajaynayaa in doodeennu noqoto dood Qaranka wax ku kordhisa, isla markaana ixtiraam u muujisa saraakiisha iyo askarta Qaranka. Waxaa la doonayaa in aynu ixtiraamno dadkaas, gaar ahaan marka aynaan wax kale u qaban karin. Danbiilaha falka gaystayna ma aha in uu garab ka helo Golayaasha Qaranka ama dad muxtarim ah. Ilaahay idamkii, waxaan rajaynayaa in waayeelka muxtarimka ah ee deegaankaas ka soo jeeda ee dhacdadaas u baxay ay nabad kaga shaqeeyaan, waanan soo dhowaynaynaa, waan taageeraynaa, waanan u ducaynaynaa.

Horaa loo yidhi: inta nabaddu jirto ninba laba nin ayuu le'eg yahay. Waxa aynu u baahanahay waa in falalkan noocan ahi aanay inagu soo noqnoqon. Hore ayay u dhici jireen, balse mararka qaarkood si habboon looma wajihi jirin, taasina waxay keentay in ay soo noqnoqdaan. Sidaas darteed, waxaan soo dhowaynayaa in Dawladdu kiiskan ugu shaqayso si nabadeed, kana fogaato cunfi, colaad iyo cudud ciidan. Dadkii falka gaystayna waa in sharciga la horkeenaa.

Waxaan taageerayaa hadalkii xildhibaan Fu'aad ee ahaa in guddiyada nabadda ka shaqaynaya aanay is-barbar socon ee la mideeyo, ujeeddo nabadeed oo mid ahna loo jeesto, isla markaana hormuud looga dhigo dadka iyo odayaasha deegaanka.

Waxaan ku adkaysanayaa in dhacdo kasta lagu eego goobteeda iyo wakhtigeeda. Xaalad siyaasadeed oo dalku ku jiro, gaar ahaan midda doorashooyinka, laguma dhex dari karo colaad iyo nabadgelyo-darro. Aad ayaan uga soo horjeedaa in nabadgelyo-darro loo adeegsado beddelidda ama carqaladaynta jadwal doorasho.

Innaga oo ah Golaha Sharci-dejinta ee ugu sarreeya dalka, masuuliyad baa inaga saaran in aynu mar walba ixtiraamno qaanuunka iyo sharciga, isla markaana aynu matalno dadka ina soo doortay, halkii aynu noqon lahayn kuwo fadhi-ku-dirir ah.

Waxaa jira qaraar maxkamadeed oo soo baxay 16/01/2022, kaas oo lagu jideeyay in dalku galo doorashooyinka ururrada siyaasadeed. Sidoo kale, Guddida Doorashooyinka Qaranku 17/07/2023 waxay soo saareen jadwalka laba doorasho: tan Madaxtooyada iyo tan Ururrada Siyaasadeed. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somalilandna 07/08/2023 ayuu soo saaray wareegto arrintaas la xidhiidha. Taasi waxay muujinaysaa in nidaamka doorashooyinka dalku socdo. Waajibaadka Golahana waa in uu guto kaalintiisa, wax-ka-beddelna ku sameeyo xeerarka doorashooyinka ee u baahan kaabis iyo saxid.

Gole ahaan, waa in aynu qaadanno masuuliyaddeenna. Waxaan taageerayaa soo jeedinta ah in la saaro guddi rasmi ah oo baadha khilaafaadka, gaar ahaan kuwa salka ku haya doorashooyinka iyo xeerarka qabyada ah. Guddiyo is-xilqaamay, inkasta oo aan ku mahadinayno dadaalkooda, ma laha mandate sharci ah ilaa Goluhu si rasmi ah u magacaabo.

Waxaa kale oo waajib inaga saaran yahay ilaalinta Dastuurka iyo qawaaniinta uu Golahani sameeyay. Waxaan soo jeedinayaa in saxaafadda dalku ay ka fogaato kicinta colaadaha, kana shaqayso isu-soo-dhaweynta bulshada.

Sidoo kale, waxaa jirta arrin ku saabsan golayaasha deegaanka, oo shaqadooda iyo xilgudashadoodu ku cad yihiin Xeer Lr. 23. Waxaa dhacday wareegto ka soo baxday Wasiirka Arrimaha Gudaha oo baal marsan Xeerkaas, gaar ahaan Qodobka 70aad. Taasi waa sharci-jab, waxaana soo jeedinayaa in Goluhu arrintaas qaraar ka soo saaro, lana xisaabtamo hay'adaha ku lugta leh.

Si loo fahmo xaaladaha maamul iyo nabadgelyo ee taagan, waxaan soo jeedinayaa in Golaha u yeedho Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo laamaha amniga, si wax looga weydiiyo dhacdooyinkan iyo masuuliyadda ka dhalatay. Goluhu waa inuu soo celiyaa isla-xisaabtankii, ma aha oo keliya samaynta xeerar.

Waxaan sidoo kale soo jeedinayaa in odayaasha deegaanka waqti la siiyo, lana ixtiraamo, si kiiska loo baadho loona helo heshiis iyo kalsooni siyaasadeed.

Ugu dambayn, waxaan soo jeedinayaa in xisbiyada mucaaradka ah ay qaataan doorkooda dastuuriga ah, kana qayb qaataan ka hadalka iyo ka hortagga nabadgelyo-darrada dalka ka dhacaysa. Xukuumaddana waxaan u soo jeedinayaa in ay ka hortagto colaadaha inta aanay dhicin, kana jawaabto dhacdooyinka si nidaamsan oo dawladnimo ku dheehan tahay, isla markaana waqti siiso odayaasha iyo cidda nabadda ka shaqaynaysa.

*Gabagabadii*, fal kasta oo dhacay, cid kasta oo gaysatay, waa in sharciga la horkeenaa.

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf** *(7Min, 24Sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, laba sano iyo badh ayaynu wada joognaa,

waxaana muhiim ah in la ixtiraamo aragtida. Looma baahna in mudanuhu ra'yigaaga kugu raaco, balse Xeer-hoosaadkeennu wuxuu dhigaya in mudane aanu mudane kale weerarin, ee uu ra'yigiisa si xushmad leh u dhiibto.

Arrinta aynu ka hadlaynaa waa **xaaladda guud ee dalka**. Xaaladda guud ma aha oo keliya Buurta Gacan-Libaax, ee waa xaalad dhaqan, dhaqaale, siyaasadeed, xasilooni, doorashooyin iyo mid bulsho. Dhammaan waxyaabahaas ayaa wada jira oo ah xaalada guud ee dalka.

Qiimaynta xaaladda guud waxaa loogu talo galay in mudanuhu ajandaha ilaaliyo, balse nafley baynu nahay, meelaha u daranna waa halka ay dadku u badanayaan. Aniguna waan ka mid ahay. Soomaaliduna waxay tidhaahdaa: *"Cudurka kaa gala fardaha, hadii laga gubo dameer dawadu ma gaadho."* Haddii aynu nidhaahno hebel baa gardaran ama hebel baa gardaran, taasi waa waxa 32 sano ka dib inagu soo celiyay jabhado iyo dhiig-daadis.

Dadkani mashaariic ayay ku murmi jireen; Burco, Boorama, Ceerigaabo iyo Laascaanood waxa laga fuliyay. Maantase waxaynu isku haynaa imisa ayaa dhintay, imisa baa dhaawac ah, imisa baa la qariyay, imisa baa hoos loo dhigay, iyo cidda ay ka soo jeedaan. Nusqaan bay ahayd in la is weydiiyo: **maxaa halkan ina keenay?**

Mudane Guddoomiye, xalkeenna waan tilmaamaynaa, dawadiisana waan sheegaynaa. Ninka sahanka ahi dadka been uma sheego. Innagu sahan baynu nahay, Gole Qaran baynu nahay. Siyaasadaha iyo qorshayaasha halkan ayaa lagu kariyaa, lagana soo saaraa. Wixii sharci lagu sixi karo, sharci baynu ku sixi doonnaa.

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu ku dhisan yahay ku dhaqanka Shareecada Islaamka, talo-wadaag, isu dheelitirka awoodaha dawladnimo, baahinta maamulka, damaanad qaadka lahaanshaha gaarka ah, suuq xor ah, iyo qiimaha qofka oo lagu ilaaliyo xuquuqdiisa aasaasiga ah. Kuwani waa tiirarka dastuurkeenna iyo wada-jirkeenna.

Dhibaatooyinka Laascaanood iyo Gacan-Libaax maanta ka taagan, Dastuurku shan qodob ayuu kaga hortagayay. Marka shantaas la waayo, dal kasta dagaal sokeeye ayuu u galaa.

Qodobadaasi waa Cadaalad iyo sinaan, Nidaam doorasho, Ka hortagga jabhadaha, Xorriyadaha aasaasiga ah iyo Talo-wadaag

Haddii talo-wadaagii meesha ka baxo, waxa maanta taagan baa imanaya. Sidaas awgeed, haddii aynu rabno daawada xanuunka ina haya, waa in aynu ku noqonaa Dastuurka oo aynu ka shaqaysiinno hay'adaha Qaranka.

Waxaan tacsi u dirayaa saraakiisha, ciidamada iyo dablaydii ku dhintay iska-horimaadyadii dhawaan dhacay. Wiirsi baa socda, wiirsigana shacabku ma abuuro;

madax baa abuura. Bishan gudahood dad ayaa lagu laayay mudaharaadkii Hargeysa, carruur 16 jir ah ayaa Sakada 5aad lagu toogtay, askari keliya lama soo qaban. Madaxweynaha waxaan leeyahay: hadalka ah in sharciga la horkeeno kuwii dilay waa sax, waana masuuliyaddaada, balse masuuliyaddaasi halkaas kuma eka. Askartii carruurta dishay iyaguna waa in sharciga la horkeenaa.

Gobollada bari waan ka gubanaynaa, dhiigii Sool wuu daadanayaa, Gaanbadhuna wuu inaga qiiqayaa. 40km oo isku wareeg ah ayay isu jiraan waddooyinka Burco, Berbera iyo Hargeysa. Waxaan is weydiinaynaa: **maxaa halkan ina gaadhsiiyay?**

Colaadahan uma iman xilligii Daahir Rayaale Kaahin iyo Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo). Waxay yimaaddeen markii wada-tashigii meesha ka baxay, is-maqnaansho iyo is-maqaluun ka soo burqadeen aqalkii Madaxtooyada oo ahayd in uu ummadda mideeyo. Marka qaran wareeno badan la abuuro, oof-wareenno badan ayaa dhalanaya, kuwaas oo keenaya qaran-dumid.

Golahayagu ma aha gole nabadgelyo, ee waa gole siyaasadeed. Dhexdhexaadnimo halkan lagama dhegeysanayo. Waxa la dhegeysanayaa runta. Markii Guddoomiyaha Golaha Guurtidu yidhi “Beel iyo beelihii kale ayaa is haya”, halkaas ayay dhibtu ka bilaabatay. Raga waa in runta loo sheego.

Shan hay’adood ayaa dalka xukuma; shantii ugu cimriga dheeraa. Waa in aynu is xakamaynaa, oo aynu nidhaahnaa kafaaya.

Waxaan naseexaynayaa dadka deegaanka Buurta Gacan-Libaax: shan gobol ayaad ku badan tihiin. Dagaalkii sokeeye ee 1994 wuxuu idinka qaatay 30 sano. Maanta in mar kale buur la fuulo, khasaare kale oo 30 sano ah ayuu keeni doonaa. Halkii aynu shilinkeennii doorasho ku bixin lahayn, qori haddii aynu ku bixinno, waxba kama imanayaan.

Waxaan codsanayaa qurba-joogta: halkii qori iyo PM aad soo diri lahaydeen, soo dira lacag doorasho lagu galo. Ragan doorasho ayaa lagu kala adkaanayaa, ee dagaal laguma kala adkaanayo.

Waxaan talo siinayaa musharraxa Madaxweynaha Xisbiga Waddani, Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro): haddii aad ogoshahay jadwalka Komishanka Doorashooyinka, caddee; haddii aad diiddan tahay, caddee. Haddii tabasho jirto, wada-hadal iyo tanaasul bay ku dhammaanaysaa. Laakiin haddii la yidhaahdo “midna ma jirto”, markaas waa in meel looga soo wada jeesto.

Ciidan xoog laguma xallin karo Sool, lagumana xallin karo Gacan-Libaax. Askarta maalin kasta ku dhimanaysa waa askar Qaranka u tabcay, danbiga dhimashadooduna siyaasiyiinta iyo hoggaanka ayaa iska leh.

Waxaan ka xumahay in meyd la dul istaago oo la aflagaadeeyo. Xumaanta wada jir looma nisbayn karo; wanaagguna wuu cad yahay. Laba nin oo dul taagnaa meydka mid baa joojiyay fawdadii, taasina waa caddayn in dhammaan dadka deegaanka aanay xumaan wadaagin.

Ugu dambayn, Madaxweynaha waxaan leeyahay: ciidan xal kuma keeni weyday Sool, Gacan-Libaaxna xal kuma keeni doontid. Xalka waa wada-hadal, damaanad, iyo in Golaha Wakiilladu iyo Golaha Guurtidu cod aqlabiyad leh ku ansixiyaan heshiis cad oo doorasho lagu galo.

**Md. Xasan Axmed Cilmi (Xasan Kayse)** (4Min, 55Sec):- Bismillaahi. Mudane Guddoomiye, Mudanayaasha Golaha iyo bahda Saxaafadda, Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Marka hore, sida ay xildhibaanadii iga horreeyeyba sheegeen, waxaan tacsi u dirayaa cid kasta oo waxyeello ka soo gaadhay xaaladaha taagan, gaar ahaan ciidamadii Somaliland ee ku geeriyooday Buurta Gacan-Libaax. Sidoo kale, waxaan tacsiyadaynayaa cid kasta oo ku dhaawacantay mudaharaadyadii, kuwii hore ugu dhintay iyo dhammaan dadkii ku waxyeelloobay xaaladihii adkaa ee dagaalka Laascaanood ka dhacay.

Intaa kadib, maaddaama aynu ka dooddayno xaaladda amni ee dalku wajahay baryahan dambe, waa in aynu marka hore is weydiinnaa: **maxaa keenaya amni-xumada?** Haddii laga war-wareego sababaha dhabta ah ee amni-xumada keenaya, lana sheegi waayo daawadeeda, dhibaatooyinku way sii soconayaan.

Anigu waxaan aaminsanahay in amni-xumada ay keeneen qodobbadan:

- Siyaasad-xumo ka timid xukuumadda.
- Cadaalad-darro soo jiitamaysay.
- Doorashooyinkii iyo dimuqraadiyaddii oo hoos loo riday.
- Xaqii muwaadinku u lahaa doorashada iyo in la doorto oo laga duudsiiyey.
- Cabudhintii ra'yiga iyo saxaafadda oo badatay.
- Dadkii doonayey inay xal u raadiyaan xaaladda amni iyo tan siyaasadeed oo aan la dhegaysan.

Arrinta dhagaysi-la'aantaasi waxay inta badan ka timid xukuumadda, waana arrin la wada ogyahay. Dad badan oo ay ka mid yihiin madax-dhaqameed, ganacsato, culimo iyo qaybo kale oo bulshada ah ayaa isu xilqaamay in ay xal u raadiyaan xaaladda murugsan, balse dhagahooda waa laga furaystay, iyaga oo faro-madhan ku soo noqday.

Arrimahaas marka ay dhacaan, waa kuwo si toos ah u dhalinaya amni-xumo iyo xaalad qalafsan. Haddaba, si looga baxo xaaladdan, waxa loo baahan yahay:

- In marka hore la helo doorashooyin la isla oggol yahay.
- In la joojiyo wax kasta oo sharci-jab ah oo ka yimaadda xukuumadda.
- In la garab istaago cid kasta oo nabadda u guntata.

Waxaan ku soo gabagabaynayaa: **siyaasad-xumadu waa tan keenta amni-xumada.** Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamuud Xayir Ducaale** *(6Min, 06Sec):-* Bismillaahi. Shir-Guddoonka, Mudanayaasha, bahda Saxaafadda iyo Shaqaalaha Golaha, Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Mudanayaal, waad ogtihiin maalintii aynu halkan nimi in aynu ku dhaaranay diinta, dalka iyo dadka. Waa in aynu mar walba xasuusnaannaa dhaartaas. Ilaahay SWT wuxuu yidhi: *"Kuwa Alle rumeeyow ku saliya Nabiga (SCW)"*. Haddaba, aynu ka baqno Ilaahay sida uu xaqa ugu leeyahay.

Waxaan tacsi u dirayaa dhammaan ciidamadii ku dhintay dagaallada Laascaanood, iyo 11-kii askari ee labadii maalmood u dambeeyey ku shahiiday Go'da-yar iyo Buurta Gacan-Libaax. Qaranka iyo eheladii ay ka baxeen waan ka tacsiyadaynayaa. Waa arrin aad u xanuun badan.

11-kaas askari waxa dilay koox shufto ah oo dariiq qalafsan maraysa. Aad ayaan uga xumahay falkii ay gaysteen. Askartaas waxa la laayay iyaga oo gudanaya hawshoodii qaran ee ahayd ilaalinta amniga. Kuwa dhaawacmay Ilaahay ha caafimaadiyo, kuwa dhintayna Janadiisa ha ku abaalmariyo.

Waxaan si adag u cambaaraynayaa falkaas ay shuftadu u gaysatay booliiska hawshoodii ku jiray. Cid kasta oo falkaa gaysatay, iyo cid kasta oo gacan ku siisayba, waa in sharciga la horkeenaa, laguna mariyaa ciqaabta ku waajibtay. Shacabka Somaliland waa in la fahamsiiyaa in shuftadaasi ay ka dambeyso cadawga Somaliland.

Waxaan soo jeedinayaa in Golahani garab istaago ciidamada Qaranka iyo Booliiska, kana shaqeeyo sidii sharciga loogu marin lahaa dembiilayaasha, iyada oo aan cafis loo fidin.

Waynu ognahay inay jirto tabasho ballaadhan iyo dib-u-dhac dalka ka jira, balse xalku kuma jiro shuftayn iyo buur la fuulo. Xalku waa wada-hadal, sida horeba loogu dhamayn jiray.

Waxaan soo jeedinayaa:

- In loo yeedho masuuliyiinta amniga qaranka, si wax looga weydiiyo shaqadooda iyo wixii dhacay.

- In la taageero soo jeedinta ah in qaraar lagu furo fadhiyada golayaasha deegaanka ee si sharci-darro ah loo joojiyey.

Ugu dambayn, Golahan waxa ka shaqeeya in ka badan laba boqol oo shaqaale ah. Waxaa muuqata daal iyo hawl yaraansho. Xaaladda dalka iyo tan Golaha labadaba waa in la is waydiiyaa lana saxo. Aad baad u mahadsan tihiin.

**Md. Saleebaan Maxamed Faarax (Goox)** *(7Min, 57Sec)*:- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-Guddoonka, Mudanayaasha Golaha, Shaqaalaha Golaha iyo bahda Saxaafadda, Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Marka hore, waxaan uga mahadcelinayaa Shir-Guddoonka sida ay u soo agaasimeen dooddan qiimaynta xaaladda dalka. Waxaan sidoo kale bogaadinayaa dhammaan xildhibaanadii ka hadlay, nin walba meeshuu doono ha ka soo jeedee, hadalladooduna ay ahaayeen kuwo wax dhisaya.

Xaaladda dalka, aniga waxaan ku sifayn karaa hal eray: **murugo**. Waxaan ku raacsanahay tacsidii loo diray askartii dhawaan ku geeriyootay dhacdooyinkii taagnaa, iyo sidoo kale sarkaalkii si aan habboonayn loola dhaqmay. Arrintaas si buuxda ayaan u cambaaraynayaa.

Waxaan taageerayaa hadalkii la xidhiidhay doorka saxaafadda, oo ah in ay noqoto mid wax dhista, ma aha mid wax dumisa. Saxaafaddu waa tiir qaran, waana in ay si masuuliyad leh u gudbisaa wararka.

Waxaan sidoo kale ku raacsanahay hadalkii xildhibaan Cabdiraxmaan Badheedhe ee xeer-beegtinnimada ku salaysnaa, maadaama uu ka soo jeedo deegaanka ay dhacdooyinku ka dhaceen. Waxaan tacsi u dirayaa dhammaan dadkii ku waxyeelloobay dagaallada Laascaanood, gaar ahaan odaygii caanka ahaa ee Digaale, guddoomiyihii ugu horreeyey ee Gobolka Sool.

Nabadda waa aasaaska nolosha. Somaliland waxa ay caan ku ahayd laba arrimood: **nabad iyo dimuqraadiyad**. Meel aan nabad ka jirin horumar kama dhalan karo; waxbarasho, ganacsi iyo nolol wanaagsan toona lama gaadhi karo. Nabad-la'aantu waxay keentaa burbur, qax, kufsi iyo kala-yaac bulsho, sida aynu ku aragnay 1988-kii iyo 1994-tii.

Sidaas darteed, waxaan taageerayaa hadal kasta oo nabadda ku jihaysan, kana soo horjeeda wax kasta oo kicin iyo burbur horseeda.

Intaas markaan ka gudbo, waxaan soo jeedinayaa qodobbadan soo socda oo aniga talo ahaan ii muuqda:

- Mudane Guddoomiye, aniga waxay ila muuqataa inaan mar dambe la samayn il-duuf siyaasadeed, isla markaana xukuumaddu ka fogaato wax kasta oo la mid ah khaladkii dhacay markii ay xasaraddii ugu horraysay ka bilaabantay Gobolka Sool. Il-duuf siyaasadeed oo dhaca wuxuu horseedi karaa masiibo, halka xalkeedu u baahnaa in si siyaasadaysan, caqli iyo miisaan leh loo wajaho.
- Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa in Golahani soo saaro **baaq nabadeed (call for peace)**, si aynu u qaadanno doorkeennnii baaqeed ee nabadda, gaar ahaan haddii hay'adihii kale ee ku shaqada lahaa ay ka gaabiyeen.
- Waxaan soo jeedinayaa in la taageero dadaal kasta iyo juhdi kasta oo nabadda lagu doonayo, iyo cid kasta oo si daacad ah ugu hawlan arrimaha nabadda.
- Waxaan ku raacsanahay mudanayaashii iga horreeyey in la mideeyo cududda kala duwan ee nabadda u kacday, lana isu keeno hal meel, kadibna laga dhex saaro cid matasha oo wada hoggaamisa dadaalladaas.
- Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in meel looga soo wada jeesto cid kasta oo carqaladaynaysa nabadda oo caqabad ku ah, hadday xukuumad tahay, hadday tahay xisbiga aan ka tirsanahay, hadday xisbiyada mucaaradku yihiin, ama cid kasta oo kale.
- Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in marka nabadda si dhab ah looga shaqeeyo oo cagaha la saaro, in miiska wada-hadalka la isugu yimaado, lana galo wada-hadal dhab ah oo wax ku ool ah.
- Waxa kale oo aan soo jeedinayaa, sida hore loo sheegay, in arrintan loo saaro gudi (committee) si qoto dheer u baaraandega, kadibna Golaha ugu soo celiya warbixin xog urursan, habaysan, oo qaabaysan.

Walaalayaal, haddii nabaddu dhab naga tahay innaga oo dhammaanteen ah, aniga oo aan eegin meelaha iyo mabda'yada aynu ka soo kala jeedno, waxaan aaminsanahay in 82-ka xubnood ee halkan fadhiya, oo laga soo doortay deegaan kala duwan, isla markaana matalaya shan milyan oo reer Somaliland ah, aynu isku raaci karno hal jid, hal ujeeddo, oo ah nabadda dalka.

Waxaan soo jeedinayaa in Mudane Cabdiraxmaan Badheedhe iyo Shir-Guddoonku inoo hoggaamiyaan dadaallada nabadda, in aynu si wadajir ah u tabliiqno nabadda, una tagno Buurta Gacan-Libaax iyo Go'da-yada, sidoo kalena haddii ay suurto-gal tahay in aynu Laascaanood gaadhno.

Hadalkeyga waxaan ku soo koobayaa in aynu dhammaanteen ka wada shaqayno nabadda. Arrintan fududaysigeedu aniga ila muuqdo mid aan munaasib ahayn.

Qosol badan uma baahna; waxa loo baahan yahay in qof walba halkiisa ka kaco oo aynu si dhab ah ugu tafa-xayanno sidii nabadda dalka loogu soo celin lahaa.

Wax waa asal, waxna waa farac. Marka hore waa in nabad la helaa; nabadda marka la helo kadib ayaa la wada hadli karaa. Marka nabaddaas cagaha la saaro, waa in miiska wada-hadalka la isugu yimaado, wixii khilaaf ah iyo wixii la wada tabanayo-na lagu dhammeeyo sida Somaliland lagu yaqaanay: **isu-tanaasul, wada-hadal, is-qancin**, lana joojiyo cid kasta oo carqalad ku ah wixii la isla qaatay. Hadalka waan badiyey, raalli ha la iga noqdo.Waad mahadsan tihiin.

**Md. Siciid Maxamed Ismaaciil (Sokeeye)** (6Min, 47Sec):- Waxaan aad uga xumahay in 32 sano ka dib aynu is waydiinno maanta in aynu nabad ku noolayn mise dagaal. Kalmadda wanaagsani waxay door weyn ka qaadataa isu-soo-dhaweynta quluubta iyo nafta dadka, arrintaas oo Ilaahay SWT ku xusay Kitaabkiisa Quraanka ah.

Haddii aynu rabno xal wanaagsan, waa in hadalkeenna noqdaa mid wanaagsan, laba darafna marka lala hadlayo aan midna la caayin, midna aan ceeb laga sheegin. Mas'uuliyadda kalmadu waxay sal u tahay natiijada laga gaadhayo ujeeddada la wado.

Ilaahay ha u naxariisto inamadii dhintay; aniga ehelkaygii baa ku jiray. Ma jiro halkan nin kale oo ehelkiisii aanu ku jirin. Ilaahay ha u naxariisto dhammaantood.

Arrintani ma ahayn wax ku yimid ciyaar iyo kaftan, balse waxay ahayd arrin lahaa qorshe, Baarlamaanka aynu maanta ku fadhinnaana qayb ayuu ku lahaa. Runta aynu is sheegno, annaga ayaynu ku gaabisnay masuuliyaddeennii ahayd in aynu xakamayno cid kasta oo masuuliyad ka haysa dalka, laga bilaabo tan ugu sarraysa ilaa tan ugu hoosaysa. Annaga ayaa qayb ka ah dhibta maanta taagan.

Baarlamaanka waxaan leeyahay ha dib isu eego, ha isa saxo, hana qaato doorkiisa saxda ah. Arrintan maanta taagan waxay ka soo bilaabantay maalmo yar kadib markii naloo dhaariyey, taas oo muujinaysa in aynu innagu sabab u nahay heerka ay wax marayaan.

Dhiigga qubanaya waa dhiiggii ubadkeenna. Deegaanka lagu dagaalamayaa waa kii aniga la iga soo doortay, waa kii aan masuuliyaddiisa u fadhiistay oo aan u dhaartay inaan nabad ku ilaaliyo. Marnaba raalli kama noqonayo in deegaankaygu noqdo goob dagaal, dhiig ku qubto, nafna ku baxdo.

Sidaa darteed, waa in si degdeg ah loo joojiyaa dagaalka ka socda Buurta Gacan-Libaax iyo agagaarkeeda. Haddii aynu ka shaqaysiino caqligeenna saliimka ah wax ka yar laba Min gudaheed, xal ayaa jira, xalkaasina waa in dalka laga qabto **doorasho la isla oggol yahay**, taas oo ah aasaaska wax kasta.

Ugu dambayn, waxaan ku soo gabo-gabaynayaa Qawlka Ilaahay SWT ee ah: *"Ilaahay yeela iyo Rasuulkiisa yeela."* Haddii aynu labadaa yeelno, is-horimaad, burbur, dhiig-daadis iyo fowdo ma jiri doonaan. Haddii kale, khilaaf, kala-tag iyo fashil ayaa imanaya.

Ilaahay waxaan ka baryayaa inuu inaga yeelo kuwa hadalkiisa wanaagsan maqla ee qaata. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamed Cismaan Maxamed** (7Min, 42Sec):- Dooddeenna shalay bilaabantay, maantana socota, cinwaankeedu waa **qiimaynta xaaladda guud ee dalka iyo talo-soo-jeedin**. Arrintu waa mid aad u ballaadhan, sidaa darteed anigu waxaan ku koobi doonaa xaaladda hadda ka taagan Gobolka Saaxil iyo Buurta Gacan-Libaax.

Si Goluhu qayb uga noqdo xalka amni ee halkaas ka taagan, waxaan soo jeedinayaa saddex qodob:

Qodobka koowaad:

- In Goluhu tacsi u diro Ciidanka Booliiska ee si gardarro ah loogu dilay Gobolka Saaxil iyo agagaarka Buurta Gacan-Libaax, isla markaana u duceeyo askartii dhaawacantay.
- In Goluhu aqoonsado dhibaatooyinkii xaq-darrada ahaa ee 30-kii sano ee Somaliland jirtay soo gaadhay ciidamada iyo shacabka, kana muujiyo ka xumaansho khaladaadkii hore.
- In Goluhu baaq iyo qaraar u diro shacabka reer Somaliland inay sharciga gacmahooda ku qaadan, kana fogaadaan wax kasta oo amni-darro ah.

Qodobka labaad:

- In Goluhu taageero dadaallada nabadeed ee hadda socda ee ku saabsan Buurta Gacan-Libaax.
- In la taageero juhdiga culimada, madax-dhaqameedka, aqoonyahanka iyo siyaasiyiinta.
- In Xildhibaanada laga soo doortay deegaannada dhibaatadu ka dhacday ay hormuud ka noqdaan dadaallada nabadeed, isla markaana gudi gaar ah loo sameeyo.

Qodobka saddexaad: Arrintan salkeedu wuxuu ku jiraa khilaafka doorashooyinka. Nasiib-darro, Golahani qayb ayuu ka ahaa dhibaatada. Maanta hay'adihii dalka ayaa soo saaray jadwal doorashooyin, Komishanka Doorashooyinkuna doorkiisii wuu gutay, hay'adaha kalena way taageereen.

Madaama oo Mudane Guddoomiye Golahan Wakiilladu yahay gole u haya Qaranka hawlo aad u muhiima, mid ka mid ah hawlahaasna tahay ilaalinta sharciga iyo in Goluhu hormuud ka noqdo saraynta sharciga, waxaan soo jeedinayaa:

- In Goluhu soo saaro baaq iyo qaraar uu ku taageerayo jadwalka doorashooyinka ee ay soo saartay Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
- In Goluhu soo saaro baaq iyo qaraar ku wajahan saami-layda doorashooyinka, kuwaas oo kala ah saddexda xisbi qaran iyo tobanka urur siyaasadeed, baaqaas oo ku boorrinaya inay si cad oo hufan, bulshada hortooda, u aqbalaan uguna taageeraan go'aanka ay soo saartay KDQ, isla markaana ay u diyaar-garoobaan doorashooyinka soo socda. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamuud Saalax Cabdi** (3Min, 41Sec):- Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha iyo Mudanayaasha sharafta leh, salaanta ka dib, waxaan jeclahay inaan hadal kooban idhaahdo.

Marka hore, waxaan la qabaa tacsidii ay direen Mudanayaashii iga horreeyey ee ku aaddan sarkaalkii, tobanka askari ee ku geeriyooday Gacan-Libaax, askarigii ka horreeyey ee isaguna halkaas ku geeriyooday, ciidamadii Qaranka ee ku dhintay Laascaanood, iyo dadkii shacab ahaa ee rasaastu ku haleeshay guryahooda. Illaahay waxaan uga baryayaa inuu u naxariisto, ehelkoodii iyo Qarankana samir iyo iimaan ka siiyo.

Intaas ka dib, dooddu waxay ku saabsayd xaaladda guud ee dalka. Anigoo aan isku fidin, waxaan diiradda saarayaa laba qodob: amniga iyo doorashooyinka.

Xaaladda guud ee dalka, anigu waxaan ku sifaynayaa aragti ku dhigan maansadii Abwaan Gaariye (Ilaahay ha u naxariistee) halka uu ka yidhi: *"Odayaashii la doortay irbad dunguul i waye, amnina noo sugi waaye; waxaase ugu liita kuwa buuraha aaday isku soo wada duub meeshu waa ulo miidhan iyo isma dhaanto dhasheed oo aan ul la qaato lahayn."*

Ka hor inta aan talooyin soo jeedin, waxaan tilmaamayaa in Golaheenna aanu bixin dareen ama sawir isku xidhaya dhacdooyinka amni-darrada iyo khilaafaadka siyaasadeed/doorashooyinka si ay u muuqdaan kuwo is-kicinaya. Mar kasta oo arrimahayaga loo wajaho isku awood sheegasho, dagaal, xabbad iyo dhimasho, sawirkaas ka soo baxaa wuxuu dalka u sii dhoweeyaa burbur. Hase yeeshee, marka wada-hadal, isu-imaansho iyo is-faham la xoojiyo, waxaa muuqata isu-soo-dhowaansho iyo xal.

Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa:

- In Goluhu soo saaro baaq nabadeed, isla markaana aanu hadda soo saarin go'aan gole.
- In arrintan gudi loo saaro, si marka ay gudiddu baaraandegto kadib loo soo saaro go'aan gole oo sal adag leh.

Marka hore, Goluhu ha ku ekaado baaq nabadeed. Sidoo kale, aynu u diyaargarowno abuurista jawiga nabadeed, jawiga wada-hadalka, iyo jawi aan qof kastaa damaciisa siyaasadeed ku hormarin baahida Qaranka ee ah nabad, horumar iyo heshiin. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Mukhtaar Xasan Maydhane** ***(14Min, 49Sec):-*** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, marka hore waan caddeynayaa in dooddani tahay xaaladda guud ee dalka, ee aanay ahayn dood gaar u kooban Gacan-Libaax. Waxaa nalaga soo doortay dalka oo dhan, waana waajib in aynu si wadajir ah u wajahno duruufaha Qaranka.

Mudane Guddoomiye, waxaan codsanayaa waqti dheeraad ah; arrimo aad u xasaasi ah ayaan rabaa inaan ka hadlo, waqti-gaabna wuu inagu ceeb yahay. Inagoo qolal qabow ku jira, in aynaan isu dulqaadan karin 25 Min halka raggeennu u dhimanayaan—xataa haday qaadato ilaa caawa—wax naga reebaya ma jirto.

Xeerka maanta ugu muranka badan waa Xeerkii Ururrada. Doorashooyinka hadda taagan, muranku wuxuu ka dhashay dib-u-dhacii iyo muddada-kordhinta kadib: ma Doorashada Ururrada ayaa la galayaa mise Doorashada Madaxtooyada? Dooddeennii waxay ku soo ururtay “xal uun keen”, balse doodihii lagu gaadhi lahaa fahan sharci iyo sababaynta go’aannada waa la cabburiyey. Haddii doodda la cabburiyo, berri lama fahmi doono sababta iyo xaaladda go’aannada lagu qaatay—taasna il-duuf ayay dhalinaysaa.

Marka hore, waxaan tacsiyadaynayaa qoysaskii, qaraabadii iyo Qarankii ay ka baxeen ciidamadeennu. Duruufaha ay ciidanku ku shaqeeyaan waa kuwo aad u adag; agoonta ay ka tagaan iyo daryeelkoodana weli si ku filan looma gudan—Insha’Allaah, waqti ayaan u qoondeyn doonnaa.

Labadii sano ee Golahani jiray, wax badan ayaa naga ba’ay; wax si muuqda inoogu soo kordhayna ma arko. Dilal joogto ah ayaa ka socday Gobolka Sool—waannu ka aamusanaynay. Arrimo kale oo waaweyn ayaa socda; damaca Itoobiya ee dekado—wali dood gole oo qotodheer kama furna. Reer Awdal maanta waxay is weydiinayaan: Somaliland ma difaacaysaa danahooda?

Mudane Guddoomiye, dalku maanta wuxuu ka baahi badan yahay run qadhaadh oo la wadaago. Haddii aynu runta isu sheegno, xalku wuu iman karaa. Waxaa naloo doortay inaan xukuumadda noqono dabarka marka seetadu go’do, balse waxaan isu waaninaa innaga oo aan xisaabtamin. Taariikhdu nama cafin doonto.

Duluc ahaan, dagaalka Laascaanood waa arrinta ugu weyn ee dalka haysata; Gacan-Libaaxna wuu ka farcamay. Arrimaha Gacan-Libaax iyo doorashooyinka waa in si kala duwan loo eego; ha la digtoonaado in xisbi lagu asteeyo Gacan-Libaax.

Baraha bulshada waxay sii kala fogaynayaan bulshada; saamayntoodu waa taban. Shaqo-la'aan, abaar iyo duruufo dhaqaale ayaa is biirsaday. Goluhu waa inuu arrimahan ka yeeshaa talo qaran.

Ugu dambayn, waxaan adkaynayaa:

- In Goluhu ka gaabsado aamusnaanta, runta la sheego.
- In la qaato baaq nabadeed sida ay soo jeediyeen Mudanayaal hore.
- In Somaliland u baahan tahay Talo Qaran, dib-u-fadhiisin iyo isu-soo-dhoweyn bulsho.

Kama bixi karno in aynu nidhaahno "sharci uun baa socda", waayo sharcigu mararka qaarkood wuxuu u ekaan karaa gar cadaawadeed; xabbad iyo eray labaduba waa wax dumisa, inkastoo ay kala fudud yihiin. Waxa aynu u baahanahay waa walaalaynta iyo isu-soo-dhoweynta dadka. Arrinta Sool waa in dib loo eego Qaraarkii hore ee aynu ka soo saarnay; waa in aynu ku noqono waxa qabsoomay, waxa dhiman, iyo waxa u baahan in dib loo hagaajiyo, arrintaasna hoos ayaa loogu daadagiyaa.

Muranka doorashooyinka waa in xal laga gaadhaa. Arrinta Gacan-Libaax, waxaan aaminsanahay inaanay ku xallismi doonin sida ay warbaahinta qaarkeed u bandhigeen; ragga buurta koray, haddii aanan taaban asalka iyo salka ay ka soo unkameen, xal waara ma iman doono.

Awoodaha Qaranka maanta isuma dheellitirsana. Shalay culayska amni-darradu wuu ina hayay, tanaasulna way fududayd; maanta marka aynu nabad u sii soconno, adkaynta, is-giijinta iyo isku-riixidu way sii badanayaan. Sidaas darteed, waa lama huraan in dib loo dheellitiro awoodaha Qaranka. Maxkamadda Sare waxay hoos u gashay Madaxtooyada; waxay u baahan tahay madax-bannaani buuxda.

Maamulka Dawladnimadu haddii uu ku soo ururo caasimadda, isna mushkilado ayuu dhalinayaa. Waxa loo baahan yahay maamul-daadejin, wax-wadaag iyo in faa'iidada dalka la gaadhsiiyo dhammaan gobollada.

Ararta Dastuurka ee ku saabsan wadatashi iyo talo-wadaag, kuwaas oo ka mid ah mabaadi'da uu dalkani ku dhisan yahay, waa qayb muhiim ah oo ka mid ah Dastuurka ay ummaddu ansixisay; kuma eka qodobbada iyo qaraarrada oo keliya, ee Arartuna waa ku jirtaa.

Mudane Guddoomiye, masuuliyiin badan oo ka mid ah xukuumadda waxaa laga maqlaa odhaahda ah "Nabaddiinna ilaashada"; waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo "Nabadda aynu wada ilaashanno". Nabadda Dawladdu aad bay ugu baahan tahay, muwaadinkuna sidoo kale aad buu ugu baahan yahay.

Gabagabadii, waxaan ku soo gunaanadayaa: aynu qiranno, Gole ahaan, in aynu Somaliland ka hagranay daraf ilaa daraf. In aad gartaada akhrisato waxba kuma

jabna; haddii maanta aynaan wax saxin, ummadda inta yar ee aynu ka qaadanno ayaynu ku dayici doonnaa, innaguna suuqa ayaynu u xoog-si tegi doonnaa. Waad mahadsan tihiin.

**Md. Maxamed Xuseen Jaamac (Ramboo)** *(4 Min, 35 Sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan tacsi u dirayaa ciidamadeennnii lagu laayay deegaanka Go'da-yar; waxaan ka tacsiyadaynayaa qoysaskii ay ka baxeen inamada geeriyooday, waxaana leenahay Ilaahay samir iyo iimaan ha idinka siiyo.

Qaranka ayay ka baxeen; qoys iyo qabiil kama ay bixin. Annaga ayay naga geeriyoodeen; Ilaahay ha u naxariisto. Ergooyinka nabadeed ee badan dhammaantood waan taageeraynaa, waxaana u ducaynaynaa in Ilaahay ku guuleeyo hawsha ay u baxeen.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, Somaliland waa Qaran isku filan, muddo dheerna hormuud u ahaa nabadda iyo dimuqraadiyadda Afrika; waa Qaran awood iyo aqoon u leh inuu maareeyo is-marin-waaga kasta haddii si daacadnimo ah loo galo.

Arrinta Buurta Gacan-Libaax waxay u baahan tahay hannaan nabadeed oo lagu xalliyo. Waxaa lama huraan ah in hoggaamiyeyaasha saddexda xisbi qaran ay yeeshaan kulan deg-deg ah oo ku saabsan arrimaha doorashooyinka, si xal iyo is-afgarad buuxa loo gaadho.

Muranka doorashooyinku wuu inagu daba dheeraaday; waa in la soo afjaraa. Hannaanka siyaasadeed iyo hoggaanka siyaasadeed waa in ay si niyad-sami ah iska kaashadaan maaraynta murannada soo noqnoqda. Maxadweynihii hore ee Koonfur Afrika, Nelson Mandela, isagoo ka hadlaya colaadaha, wuxuu yidhi: *"Cadho iyo uur-ku-taallo waa sida qof sun cabaya si uu u dilo cadowgiisa; suntaasina isaga ayay dishaa."* Colaadda sokeeye waa tan ugu daran; waa kugu dhimay oo kaa dhimay. Sidaa darteed, qof kasta oo reer Somaliland ah waa inuu ka shaqeeyaa nabadda oo keliya, ee aan colaad.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, nabaddu waa hubka ugu weyn ee lagu horumariyo dalka. Qof kasta oo wax tabanaya wuxuu heli karaa dariiq nabadeed oo uu ku maro tabashadiisa. Waa in aynu dhammaanteen taageernaa dadaallada nabadeed ee socda.

Xilligan oo baraha bulshadu hoggaaminayaan war-helidda iyo xiriirka dadweynaha, waxaa muuqata si-xun u isticmaalid iyo kicin dadweyne. Dalal badan oo dhibaatooyin culus ka dhaceen, waxaa dambeba la ogaaday in baraha bulshadu door ku lahaayeen kicinta rabshadaha—sida dalka Myanmar. Sidaa darteed,

waxaan ka codsanayaa dadka reer Somaliland, gaar ahaan qurbo-joogta, in samaha laga wada shaqeeyo, lana iska ilaaliyo colaad iyo xumaan.

Somaliland waa dalkeennii; wixii aynu tabanayno wada-hadal ayaa lagu gaadhi karaa. Qoriga ha la damiyo; xalku waa dood iyo fadhi geedka hoostiisa ah, sidii caadadeenna ahayd.

Arrinta taagan waxaa sababay khilaafka doorashooyinka. Khilaafkaas waa in laga heshiiyo. Jadwal doorasho oo qorshaysan ayay soo saartay Komishanka Doorashooyinka Qaranka, waxaana xigay wareegto Madaxweynenimo; haddana wali heshiis kama dambays ah lagama gaadhin, waqtiguna wuu socdaa. Haddii aan laga heshiin, dib-u-dhac doorashooyin ayaa imanaya.

Waxaan soo jeedinayaa, anigoo ayidaya, in masuuliyiinta saddexda xisbi qaran (Kulmiye, UCID iyo Waddani) ay yeeshaan kulan deg-deg ah oo ay xal ku gaadhaan, isla markaana xisbiyada mucaaradku ay door muuqda ka qaataan arrinta Buurta Gacan-Libaax.

**Md. Yaxye Cabdillaahi Aamiin** *(5Min, 25Sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye, Xildhibaanno, shaqaalaha iyo saxaafadda, dhammaantiin waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka: Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatuhu.

Shalay iyo maanta waxaynu u fadhiinnay dood ku saabsan xaaladda guud ee dalka, gaar ahaan amniga. Toddobadii bilood ee u dambeeyay dagaal ayaa ka jiray Gobolka Sool, ilaa maantana wuu socdaa. Dadaal waan gelinnay; guddi waan u saarnay, baaqna waa la soo saaray, hase yeeshee arrintu weli way taagan tahay. Waa in aynu guntiga dhiisha iskaga dhignaa, annagoo Gole ahaan ka qabanayna wixii awooddeena ah.

Arrinta Buurta Gacan-Libaax, waxaan la qabaa Mudanayaashii iga horreeyay. Waxaan tacsi tiiraanyo leh u dirayaa eheladii, qaraabadii, qoysaskii ay ka baxeen, iyo Qarankaba, askartii lagu laayay deegaanka Go'da-yar; sidoo kale waxaan si gaar ah u canbaaraynayaa falkii lagula kacay sarkaalkii ka mid ahaa askarta halkaas ku geeriyootay.

Xaaladda Gacan-Libaax waxay salka ku haysaa khilaafka siyaasadeed ee dalka ka jira. Waxaan ku boorrinayaa in khilaafka u dhexeeya axsaabta iyo Dawladda lagu soo afjaro miis nabadeed, iyadoo Dawladdu hormuud ka noqoto oo ay suurta-geliso wax kasta oo lagu gaadhi karo nabad.

Qolada buurta gashay waxaan leeyahay: ha inoo noqon xeer in qori wax lagu doono; kursi iyo talo waa in nabad, is-fahan, wadatashi iyo wada-hadal lagu raadiyaa.

Goleheenna waa gole sharci-dajin. Haddii aynu aqbalno in qori wax lagu kala qaato, xeerarka aynu dejinayno ayay ka mid noqonaysaa; hase yeeshee haddii aynu 82-keenna isu guntanno, wax baan ka qaban karnaa, dhulka ayaynu ku soo dhigi karnaa.

Golaha Wakiilladu cid uga aqoon badan ama uga faro-dhuudhuuban ma jirto. Waxaan ku talinayaa in midaynta dadaallada nabadeed ee ay hoggaaminayaan salaadiinta, cuqaasha iyo wax-garadka kale, annagu hormuud ka noqono, oo aynu miiska wada-hadalka isugu keeno Dawladda iyo Axsaabta, si hawshaas loo soo afjaro.

Waxaan kale oo aan ku talin lahaa in baraha bulshada iyo saxaafaddu iyaguna ka fogaadaan inay dabka batroolka ku sii shiddaan, balse ay qaataan doorkooda mas'uuliyadeed ee wax-ku-oolka ah. Iyaguna waxay ka mid yihiin muwaadiniinta Jamhuuriyadda Somaliland; sidaa awgeed, saxaafadda waxaan leeyahay: wax waad nagala qaban kartaan, ee nala qabta.

Qurbajoogta iyo adeegsadayaasha baraha bulshadana waxaan leeyahay: dalku waa dalkiinnii. Inaad ku nooshihiin dalal shisheeye oo aad haysataan nabad iyo deggenaansho, micnaheedu ma aha in doorkiinna la iska illoobo. Berri ka maalin, halka aad ku soo noqonaysaan waa halkan; sidaa darteed, waa in aad nagala shaqaysaan sidii nabadda dalka loo gaadhi lahaa.

Waxaan aad iyo aad ugu mahadcelinayaa labadii xildhibaan ee shalay halkan ka hadlay, Mudane Cabdiraxmaan Badheedhe iyo Mudane Cabdikariim Aadan Cali, sida xikmadaysan, murtiyaysan oo miisaaman ee ay arrinta uga hadleen. Anigu waxaan aaminsanahay inaanan kaliya ka daba-hadlin, balse ay habboon tahay in aynu qaadanno tallooyinkii ay soo jeediyeen.

Waxaan hadalkayga ku soo gabagabaynayaa: haddii 82-keenna xildhibaan aynu guntiga dhiisha iskaga xidhno, aynu daacad ka noqono xilkeenna, isla markaana aynu masuuliyad dhab ah iska saarno, arrintan waa la dhamayn karaa. WSC.

**Md. Cabdirashiid Cabdillaahi Muuse** *(22Min, 45Sec):* Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, hawl-wadeennada Golaha, warbaahinta iyo dhammaan inta ay gaadhayso, waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka: Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatuhu.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, ugu horrayn waxaan bogaadinayaa doodda Mudanayaasha Golaha Wakiillada ee la xidhiidha qiimaynta xaaladda guud ee dalka, anigoo ka duulaya ahmiyadda ay leedahay ka doodista xaaladda guud ee dalka, taas oo ah qodob ka mid ah ajandaha kal-fadhiga 4aad ee Golaha.

Aniga oo maanka ku haya xaaladaha iyo xaqiiqooyinka ka taagan dalkeenna, waxaan doodayda gun-dhig uga dhigayaa dhinacyada nabadgelyada, arrimaha bulshada, dhaqaalaha, siyaasadda, iyo xidhiidhka arrimaha dibedda.

Dooddaydu waxa ay ku salaysan tahay doorka, waajibaadka iyo xil-gudashada Golaha Wakiillada ee ku wajahan xaaladaha dhaqan-dhaqaale, bulsho, nabadgelyo iyo siyaasadeed, isaga oo gudanaya waajibaadkiisa guud ee metelaad, kor-joogtayn iyo xeer-dejin.

Xilligan la joogo, waxa ugu mudan in laga hadlo waa xaaladda gudaha ee dalku ku jiro. Dhammaanteen waxaynu ka wada dheregsanahay duruufaha ku gadaaman arrimaha gudaha ee dalkeenna, gaar ahaan xaaladda amni ee isa soo taraysa. Sanadka 2023-ku wuxuu ku bilaabmay xaalado colaadeed, kuwaas oo ay ugu weynayd dagaalladii isdaba-joogga ahaa ee ka dhacay Laascaanood. Anigu waxaan qabaa in wax badan laga hortegi kari lahaa, hase yeeshee waxaa jiray dadaallo faro badan oo ay sameeyeen dadyow kala duwan, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen madax-dhaqameedka reer Somaliland, Golaha Wakiillada oo u saaray guddi gaar ah, beesha caalamka iyo kooxo kale. Si kastaba ha ahaatee, waxa halkaas ka dhacay khasaaro naf, mid maaliyadeed iyo mid bulsho, iyada oo shacab aad u tiro badani ay ka qaxeen barohoodii iyo guryahoodii.

Aniga oo aragti ahaan u hadlaya, waxaan qabaa in wixii Alle inoo qoray ay hore inooga dhinteen, khasaaruhuna intaas inoogu filnaado, isla markaana arrintaas loo midoobo sidii waan-waan iyo nabad loogu soo dabaali lahaa. Inkasta oo ay jiraan dad badan oo ka rajo dhigay arrintaas, anigu waxaan qabaa inaan laga quusan karin, lana isku dayo wax kasta oo suurto-gal ah oo lagu soo afjari karo, si dhammaanteen aynu uga wada qayb qaadanno sidii nabad loogu soo dabaali lahaa magaalada Laascaanood.

Arrinta kale ee xusidda mudan waa dhalinyarada u baxday Buurta Gacan-Libaax, taas oo iyaduna ah nasiib-darro kale oo laga baaqsan kari lahaa. Waxaa jiray dadaallo badan oo ay sameeyeen guddiyo is-xilqaamay, kuwaas oo ay ugu horreeyeen mudanayaal ka tirsan Golahan, kuwaas oo uu guddoominayey Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Mudane Yaasiin Xaaji Maxamuud Xiir, iyo sidoo kale guddidii ganacsatada, kuwaas oo dhammaantood mudan mahadnaq. Hase yeeshee, illaa iminka laguma guulaysan xallinta arrintaas.

Soomaalidu waxay ku maah-maahdaa “milil guud lama dhayo”. Sidaa darteed, waxa aynu u baahanahay in asalka dhibaatada dhalisay bixitaanka dhalinyaradaas, oo ah muranka doorashooyinka, laga gaadho is-fahan siyaasadeed, lana isu keeno dhinacyada is haya, wixii khilaaf ahna si kama dambays ah loo soo afjaro, si aanay arrintu ugu ekaan “Cali gar leh iyo Caydiid gar leh”.

Is-cabudhin, is-muquunin iyo isku xoog-sheegasho wax xal ah ma keenaan; balse is-fahan, isu-tanaasul iyo wax-wada-lahaansho ayaynu ku soo caano-maalnay, sidaas ayaanay Somaliland ku gaadhi kartaa horumar, wadajir iyo barwaaqo.

Aniga oo gudanaya xilka mudanannimo ee ku tilmaaman Qodobka 13aad ee Xeer-hoosaadka Golaha, isla markaana maanka ku haya waajibaadka Golaha Wakiillada ee lagu faahfaahiyey Qodobka 39aad ee Dastuurka, waxa dalkeenna ka taagan xaalado iyo duruufo ragaadiyey nolosha guud ee bulshada, kuwaas oo ay ka mid yihiin roobabkii oo yaraaday, maciishadda oo kor u kacday, shaqo-la'aan baahsan, iyo helitaanka adeegyada bulshada, gaar ahaan caafimaadka, waxbarashada, la dagaallanka mukhaadaraadka, iyo daryeelka bulshada baylahsan ee ku nool Jamhuuriyadda Somaliland.

Waa xaqiiqo aan indhaha laga qarsan karin in dalkeenna ay ka jirto shaqo-la'aan baahsan, taas oo saamayn taban ku yeelatay hab-nololeedka bulshada, gaar ahaan jiilka da'da yar. Iyadoo aynu ognahay in sannad kasta ay jaamacadaha iyo goobaha waxbarashadu ka qalin-jabiyaan dhalinyaro bartay culuum kala duwan, haddana waxaa muuqata inaan loo diyaarin qorshe cad oo ay aqoontooda ugu adeegi lahaayeen bulshadooda. Haddii ay sii socoto kor u kaca shaqo-la'aantu, waxa laga dhaxli karaa khatar amni, korodh tahriib iyo socdaal sharci-darro ah, badashada shaqaalaha ajaanibka ah, isticmaalka mukhaadaraadka, iyo kala-duwanaansho bulsho oo taban.

Anaga oo xiganayna **Qodobka 20aad** ee Dastuurka oo muwaadiniinta u dammaanad qaaday xaqa shaqada, bulshada Jamhuuriyadda Somaliland, gaar ahaan dhalinyarada ina dooratay, waxay innaga sugayaan inaan dejinno xeerar iyo siyaasado abuuraya fursado shaqo-abuur. Sidoo kale, waxa lagama maarmaan ah in dib-u-eegis lagu sameeyo xeerarka hore ee la xidhiidha shaqo-abuurka, sida Xeerka Maalgashiga (Xeer Lr. 99/2021), Xeerarka Aagga Ganacsiga Ka-Caaggan Cashuuraha, Xeerka Kalluumaysiga (Xeer Lr. 84/2018), iyo guud ahaan xeerarka la xidhiidha ganacsiga iyo dhaqaalaha, iyadoo Goluhuna la xisaabtami doono dhammaan hay'adaha ku lugta leh shaqo-abuurka iyo hirgelinta xeerarkaasi.

Sida uu Dastuurku ku caddeeyey Qodobka 17aad, helitaanka adeegyo caafimaad waa xaq muwaadin. Hase yeeshee, muwaadiniinta Somaliland waxay la ildaran yihiin helitaanka adeegyo caafimaad oo tayo leh oo samatabixin kara noloshooda. Taasi waxay keentay in muwaadiniin badani ay adeegyo caafimaad u raadsadaan dalalka jaarka ah iyo kuwo kale oo ka durugsan, taas oo sababtay khasaare dhaqaale iyo wakhti badan, isla markaana culays weyn ku noqotay qoysaska iyo dhaqaalaha guud ee dalka.

Waxaan xog-ogaal u ahay in cusbitaallada ay Dawladdu gacanta ku hayso ay aad u hoosayso helitaanka adeegyada caafimaad, iyadoo qaar ka mid ahi ay ku guuldarraysteen bixinta adeegyada maaraynta bukaannada deegaannadooda

(catchment area). Waxa kale oo jira deegaanno badan oo aanay gaadhin adeegyada caafimaadka aasaasiga ah, halka kuwo kale oo ay gaadheen aanay haysan shaqaale ku filan ama agab caafimaad oo dhammaystiran.

Mudanayaal, si gaar ah waxaan u dul istaagayaa labadii sano ee u dambeeyay, muddadaas oo Golahani ansixiyey lacag dhan 200 shilling-ka Somaliland ah, marna 500 shilling, oo loo dul saaray kiiloo kasta oo qaadka ah ee soo gala dalka. Cashuurtaas oo Wasaaradda Maaliyaddu qaabilsan tahay ururinteeda, ilaa imikana wax warbixin ah lama soo gudbin oo muujinaysa inta lacag ah ee la ururiyey, halka ay ku baxday, iyo saamaynta ay ku yeelatay adeegyada caafimaadka, gaar ahaan daryeelka dadka qaba xanuunnada dhimirka.

In lacag laga jaro muwaadiniinta waxa ka horreeya in la helo qorshayaal iyo siyaasado cadcad oo lagu hagayo isticmaalka lacagtaas, si hadhow ay u caddaato waxqabadkeeda, isla markaana loo hubiyo daah-furnaan iyo isla-xisaabtan dhab ah.

Sidaa awgeed, innaga oo gudanayna waajibaadkeenna dastuuriga ah, waxaa lagama maarmaan ah in aynu dejinno xeerar jidaynaya horumarinta adeegyada caafimaad, isla markaana lagu dhisayo kaabayaasha bixinta adeegyadaas, sidoo kalena lala xisaabtamo hay'adaha xukuumadda ugu xil-saaran bixinta adeegyada caafimaadka.

Dalkeenna waxa si isa soo taraysa ugu sii badanaya khatarta mukhaadaraadka, gaar ahaan khamriga iyo xashiishadda, kuwaas oo si furan uga soo gudbaya xuduudaha dalka, arrintaas oo khatar weyn ku ah bad-qabka bulshada, gaar ahaan da'yarta, jiilka mustaqbalka iyo amniga guud ee qaranka.

La-dagaallanka noocyada kala duwan ee mukhaadaraadku waa arrin ka ballaadhan awoodda hay'adaha sharci-fulinta oo keliya, sidoo kale caqabad weyn ayay ku tahay hay'adaha garsoorka, kuwaas oo si joogto ah u qaada dacwooyin isla markaana u rida xukunno kala duwan eedeysanayaasha.

Golihii innaga horreeyay waxa uu curiyey Xeerka La-dagaallanka Maandooriyaha Xeer Lr. 21/2021, kaas oo hadda dhaqan-gal ah. Xeerkaasi waxa uu suurto-geliyey in la qaado tallaabooyin sharciyeed oo ka dhan ah dadka ku lug leh ganacsiga iyo isticmaalka maandooriyaha, hase yeeshee waxaa muuqata in uusan bixin ciqaabo ku filan oo hay'adaha garsoorku ku wajahi karaan cid kasta oo falalkan siyaabo kala duwan ugu lug leh.

Xukuumaddu waxay ku guuldarraysatay dejinta siyaasado iyo qorshayaal wax-ku-ool ah oo lagu yaraynayo ama lagu dabar-goynayo ku lug lahaanshaha dhallinyarada ee mukhaadaraadka. Sidaa darteed, gole ahaan waxaa innagu waajib ah in aynu curinno xeerar dheeraad ah oo si dhammeystiran ula dagaallama mukhaadaraadka, isla markaana aynu kor-joogteyno hay'adaha loo xilsaaray

hirgelinta iyo fulinta xeerarkaas. Waxa kale oo xusid mudan in xukuumaddu ku guuldarraysatay inay diyaarsato xarumo lagu dhaqan-celin karo dhallinyarada kasoo kabanaysa qabatinka mukhaadaraadka (addiction).

Qaran ahaan, Somaliland waxay muddo ku dhow 33 sano ku jirtaa halgan ay ku raadinayso aqoonsi buuxa oo caalami ah. Inta muddadaas ah, Somaliland waxay buuxisay dhammaan shuruudaha ku xusan heshiiska caalamiga ah ee qeexaya dawladnimada ee lagu ansixiyey shirkii Montevideo ee sannadkii 1933, kaas oo loo yaqaan Cahdiga Montevideo.

Muddadaas, Somaliland waxay hirgelisay go'aammo masiiri ah oo ay bulshada Somaliland wada gaadheen, sida dejinta Dastuur ku dhisan shareecada Islaamka, dhaqanka iyo qaanuunka caalamiga ah, dhismaha hay'adaha dawliga ah, qabashada doorashooyin ku dhisan xeerar iyo habraacyo la isla oggol yahay, iyo kobcinta ilo-dhaqaale oo aan ku tiirsanayn deeqo shisheeye.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa muuqata in qaran ahaan aynu ka gaabinnay waxyaabo badan oo aynu qaban kari lahayn. Qaranka muddo 33 sano ah u halgamaya aqoonsigu weli ma laha siyaasad cad oo ku dhisan danihiisa qaran, isla markaana lagu gaadhi karo yoolka aqoonsiga. Xukuumadihii kala dambeeyay waxa ay ku guuldarraysteen inay dib u habayn ku sameeyaan nidaamka dhismaha safaaradaha iyo xafiisyada metela Somaliland, iyadoo aan mudnaan la siin ku habboonaanshaha iyo tayada cidda metelaysa qaranka.

Sidoo kale, siyaasadda gudaha ee dalku waxay saamayn taban ku yeelatay jihaynta siyaasadda arrimaha dibadda, iyada oo mudnaan la siiyay dano gaar ah oo siyaasadeed halkii laga dhisi lahaa aragti qaran oo mideysan. Arrimaha dibaddu waxay u baahan yihiin in si qaranimo ah loo wajaho, lana qabto kulan qaran oo lagu gorfeeyo laguna mideeyo mabaadi'da hagaya siyaasadda arrimaha dibadda.

Waxaan aaminsanahay in hirgelinta dimuqraadiyadda Somaliland ay si toos ah ugu xidhan tahay qabashada doorashooyin xor ah iyo maamul-wanaag. Doorashooyinku waa waajib dastuuriga ah, hase yeeshee caqabadda ugu weyn ee hortaagan waa waxa loo yaqaan muddo-kordhin, taas oo si weyn u dhaawacday sumcaddii dimuqraadiyadeed ee dalka.

Inkasta oo aanan rabin inaan si dheer ugu fogaado arrinta doorashooyinka, haddana waa xaqiiqo jirta in su'aalo badan ay taagan yihiin, sida: maxaa sababa in doorashooyinka aan loogu qaban wakhtigii loogu talagalay? Maxaa keenay in muddo ka badan 20 sano aanay jirin doorasho ku dhacday waqtigeedii? Ma la sameeyay daraasad cilmiyeysan oo lagu ogaanayo sababaha keenaya dib-u-dhacyada soo noqnoqda? Cid walba oo door ku leh qabashada doorashooyinka ma lala xisaabtamay doorkii ay ku lahayd fashilka ku yimid?

Qodobadaas oo dhan waxay u baahan yihiin in si cilmiyeed, deggan oo ka fog caadifad loo derso, isla markaana golahani qaato doorkiisa dastuuriga ah, loona saaro guddi gaar ah oo daraasadaysa arrimahaas, golahana u soo celisa warbixin dhammaystiran, si go'aammo gole looga gaadho.

Intaas marka laga yimaaddo, Komishanka Doorashooyinku waxa uu soo saaray jadwalka doorashooyinka ururrada iyo madaxtooyada, jadwalkuna waa mid aad u cidhiidhi ah, maalin kasta oo ina dhaaftana waxa ay ka go'antahay shaqo la qaban lahaa. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa:

In is-faham siyaasadeed laga gaadho arrintaas, lana isugu keeno dhammaan daneeyayaasha si loo dhammeeyo tabashooyinka jira. In Golahani dedejiyo dhammaystirka iyo wax-ka-beddelka shuruucda lagu geli doono doorashooyinka. In beesha caalamka iyo saaxiibbada Somaliland laga dalbado taageerada dhaqaale ee qabashada doorashooyinka. In Xukuumaddu diyaarsato wixii dhankeeda ah ee siyaasad, dhaqaale iyo farsamo ee ku xidhan hirgelinta doorashooyinka.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, marka laga hadlayo dhaqaalaha dalka, waxaan jeclahay inaan si guud u taabto xaaladda dhaqaale ee uu dalku marayo, anigoo eegaya dhinacyada wax-soo-saarka, ganacsiga, kaabayaasha dhaqaalaha, bangiyada, maaliyadda iyo guud ahaan khayraadka dalka.

Wax-soo-saarka dalka, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waad ka warqabtaan in uu marayo heer aad u hooseeya, iyadoo aynu ognahay in ka badan 90% wixii aynu isticmaalno aynu dibadda ka soo dhoofinno. Waxa aynu dibadda ka keensannaa dhammaan quutal-daruuriga aynu si maalinle ah u isticmaalno, sida cuntada, khudaarta, dawooyinka iyo hu'ga kala duwan. Sida ku cad warbixinta ay soo saartay Wasaaradda Maaliyaddu, saddexdii bilood ee ugu horreeyey sannadka 2023 waxa dalka lagu soo iibiyey badeecooyin qiimahoodu gaadhayo 2.232 trillion Shilling-ka Somaliland ah, taas oo muujinaysa dhiig-bax weyn oo ku yimaadda lacagta adag ee dalka ka baxaysa.

Waxa kale oo aynu dareensanahay duruufaha ku gadaaman dunida oo gashay marxalad colaadeed, dal walbana qaatay siyaasad gunti-giijis ah. Waxa aynu ka warqabnaa in qaar ka mid ah dalalkii aynu ka soo dhoofin jirnay quutal-daruuriga ay colaad gudaha ah ka jiraan, sida Itoobiya oo aynu ka keeni jirnay khudaarta, iyo dalal kale sida Masar oo aynu ka soo dhoofin jirnay daqiiqda, kuwaas oo dhoofintii joojiyey ama ay ku yimaaddeen carqalado waaweyn.

Sidoo kale, dhammaan quutal-daruurigii ayaa qiimahoodii kor u kacay, sida ku cad warbixinta halbeegga lagu cabbiro sicir-bararka (CPI) ee ay soo saarto Wasaaradda Qorshaynta Qaranku, arrintaas oo welwel weyn ku haysa guud ahaan shacabka Somaliland, iyadoo aanay muuqan xalal ama dadaallo taabogal ah oo ay Dawladdu qorshaynayso.

Dhanka kale, waxa aynu ognahay in laf-dhabarta dhaqaalaha dalkeennu uu yahay dhoofka xoolaha. Waxa kale oo la wada ogyahay in dhoofkii xoolaha la fasaxay horraantii sannadkii hore, isla markaana xoolihii ugu badnaa ay dalka ka dhoofeen sannadkan, sababta ugu weynina ay ahayd in xilliggii Xajka xoolihii caadiyan ka dhoofi jiray dekedaha Geeska Afrika, gaar ahaan dekedda Suudaan, ay ka dhoofaan dekedda Berbera. Arrintaasi waa mid kor u qaadday dakhliga iyo koboca dhaqaalaha, balse su'aasha mudan in la is weydiiyo waxay tahay in waaxda wax-soo-saarka dalku ay u diyaarsan tahay qorshayaashii iyo siyaasaddihii lagu horumarin lahaa wax-soo-saarka si loo helo damaanad-qaad dhuuniga. Sidaa awgeed, waxaan qabaa in Golahani si dhaw ula socdo waxqabadka hay'adaha dawladda ee u qaabilsan wax-soo-saarka.

Ganacsiga, maalgashiga, maaliyadda iyo bangiyada marka laga hadlayo, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland qodobkiisa 11aad farqaddiisa 1aad, Dawladda waxa ku waajib ah kor u qaadidda wax-soo-saarka, sare u qaadidda heerka nololeed, abuuridda goobo shaqo iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha dalka, iyada oo dejinaysa siyaasad dhaqaale oo ku dhisan mabaadi'da suuqa xorta ah, isla markaana la is-garab taago hantida qaranka iyo maalgelinta shisheeye.

Kobcinta ganacsiga iyo u abuuridda jawi ku habboon oo ay ganacsatadu ku shaqaystaan waa waajib weyn oo saaran xukuumadda, ilaalinta in waajibkaas la guto-na waa masuuliyad inaga saaran Golahan. Meelaha ugu muhiimsan ee lagu cabbiro horumarka ganacsiga waxa ka mid ah tirada ganacsatada is-diiwaangelisay ee qaadatay liisannada ganacsiga. Sida ku cad warbixinta dhaqaalaha ee ay soo saartay Wasaaradda Maaliyaddu, tirada ganacsatada liisan qaadatay saddexdii bilood ee ugu horreeyey sannadkan ayaa ka badatay tiradii isla muddadaas sannadkii hore.

Dhanka kale, waa in la xusaa in suuqa ugu weyn Somaliland ee Waaheen uu gubtay, taas oo keentay in ganacsato badan ay hantidoodii ku waayayaan masiibadaas. Inkasta oo dib-u-dhiskii suuqaasi socdo, haddana qaylo-dhaan badan ayaa ka yeedhay shirkaddii la siiyey qandaraaska dib-u-dhiska suuqa, taas oo laga leeyahay dalka Iswatini. Waxaan qabaa in doorkii Golaha ee kor-joogtaynta iyo dabagalka mashruucaasi uu gaabis ku yimid, waxaanan soo jeedinayaa in warbixin sugan oo dhammaystiran laga keeno mashruucaasi, maaddaama uu suuqaasi yahay halbawlaha koboca dhaqaale ee dalka.

Helitaanka maalgelin shisheeye iyo mid gudaha ah waxa uu door weyn ka qaataa koboca dhaqaalaha iyo abuurista fursado shaqo oo lagu yarayn karo shaqo-la'aanta baahsan ee dalka ka jirta. Waxa aynu ka warqabnaa in maalgelintii ay DP World ku samaysay dekedda Berbera ay wax weyn ka beddeshay nidaamka adeeg-bixinta dekedda. Si kastaba ha ahaatee, waa nasiib-darro in muddada ku dhow lixda sano

ah ee ay xukuumadda Muuse Biixi talada haysay aanay jirin maalgelin shisheeye oo weyn oo dalka la keenay oo la xusi karo.

Dhanka kale, waxaa ammaan mudan in maalgelinta gudaha ay korodhay sannadihii u dambeeyey, iyada oo ganacsato Somaliland ahi ay fuliyeen mashaariic waaweyn oo ay dalka ku maalgashadeen, sida warshadda dalka ee samaysa daqiiqda iyo warshadda cusub ee soo saari doonta kalluunka tuunaha ee Somtuna Fishing Company, taas oo wax weyn ka tari doonta dhaqaalaha dalka.

Waxaan fursaddan uga faa'iidaysanayaa inaan hambalyeeyo isla markaana bogaadiyo ganacsatada ku dhiirraday maalgelinta dalkooda, waxaanan ugu baaqayaa ganacsatada kale iyo shakhsiyaadka haysta hantida inay dalka ku maalgashadaan. Gole ahaan, waxa innagu waajib ah inaan samayno xeerar ilaalinaya maalgelinta gudaha, kuwa jira-na dib u eegis ku samayno si ay ula jaanqaadaan isbeddellada maalgashi ee dalka ka socda.

Waxaa kale oo xusid mudan in bangiyada gaarka loo leeyahay ee Somaliland ay tiro ahaan iyo adeeg ahaanba koreen, isla markaana ay door weyn ka qaateen koboca dhaqaalaha. Si kastaba ha ahaatee, waxa aan tabayaa maqnaanshaha bangiyo caalami ah oo maalgelin siiya ganacsatada iyo muwaadiniinta haysta fikrado ganacsi balse aan haysan raasamaal ay ku hirgeliyaan, taas oo fursad weyn u noqon lahayd la-dagaallanka shaqo-la'aanta.

Sidaa darteed, waxaan qabaa in la joogo waqtigii si rasmi ah loo kala saari lahaa Baanka Dhexe ee Somaliland iyo Baanka Ganacsiga Somaliland oo hadda isku jira, isla markaana la aasaasi lahaa Baanka Ganacsiga Somaliland si uu u guto waajibaadkiisa, uguna xidhmo nidaamka bangiyada caalamiga ah. Waxaan soo jeedinayaa in la curiyo xeerka Baanka Ganacsiga Somaliland, isla markaana wax ka beddel iyo kaabis lagu sameeyo Xeerka Baanka Dhexe iyo Xeerka Bangiyada Islaamiga ah.

Helitaanka kaabayaal dhaqaale oo ay ka mid yihiin dekedaha, garoomada diyaaradaha iyo waddooyinka waxa ay door weyn ka ciyaaraan horumarka iyo isku xidhka dalka iyo dunidaba. Sidaa darteed, waa lama huraan in qaranku yeesho siyaasado iyo qorshayaal cadcad. Inkasta oo ay jiraan dadaallo dib-u-dhis ah oo lagu samaynayo waddooyinka isku xidha magaalooyinka iyo mashruuca weyn ee Berbera Corridor oo isku xidhaya Somaliland iyo Itoobiya, iyo sidoo kale horumarinta dekedaha dalka sida dekedda Maydh, haddana waxa xusid mudan in gobollo waaweyn ay wali ka arradan yihiin kaabayaal dhaqaale oo aasaasi ah.

Gobolladaas waxa ka mid ah Gobolka Togdheer, kaas oo baahi weyn u qaba garoon diyaaradeed, maaddaama uu yahay gobolka ay qurbo-joogtiisu aad u badan tahay. Arrintaasi waxay keentay in qurbo-joog badan oo reer Togdheer ahi ay dib ugu soo laaban waayaan dalka. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in

miisaaniyadda sannadka 2024 lagu daro mashruuca dib-u-dhiska garoonka diyaaradaha Gobolka Togdheer, anigoo ballanqaadaya in ganacsatada gobolka, qurbo-joogta gobolka iyo guud ahaan ganacsatada Somaliland ay ka qayb qaadan doonaan dib-u-dhiska garoonkaas.

Ugu dambayn, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan hadalkayga ku soo afmeerayaa in dalku maanta marayo xaalad adag oo cakiran dhinac kasta. Waxa kale oo jira culaysyo badan oo caalami ah, iyadoo dunidu gashay marxalad gunti-giijisnimo ah. Mudane kasta oo xil haya, taariikhdu way qori doontaa kaalinta uu qaatay, waxaana uu gali doonaa bog cagaaran ama bog cas, dadka iyo jiilalka dambena waxay ina xasuusan doonaan sida aynu uga dabaalanay marxaladdan adag, cidna uma maqna, ceelna looma qodna.

Sidaa darteed, waxaan mudane kasta ku baraarujinayaa inuu maanka ku hayo dhaartii uu u maray dalkan iyo dadkan, isla markaana aynu iska illoowno wixii aynu ku kala duwanahay, aynuna u midowno badbaadinta dalka iyo ka gudbidda marxaladdan adag ee aynu ku jirno.

Waxaan Eebbe Wayne ka baryayaa inuu quluubteena isu soo dhoweeyo, naguna garansiiyo masuuliyadda ballaadhan ee ina hortaalla.

**Md. Maxamed Khadar Daahir** *(6Min, 40Sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha Golaha Wakiillada, Saxaafadda iyo shacabka Jamhuuriyadda Somaliland, dhammaantiin waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka. Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuhu.

Mudane Guddoomiye, waad ku mahadsan tahay fursadda aad ii siisay inaan ka hadlo xaaladda guud ee dalka. Waxaan jeclaan lahaa inaan doodayda ku saleeyo saddex qodob.

Mudanayaal, waxaad ka war qabtaan in xaaladda amniga dalku ay aad u liidato, inkasta oo gobollo badan ay nabad qabaan, haddana weli waxa jira colaado ka taagan qaybo ka mid ah dalka. Waxaad la socotaan waxa ka socda Gobolka Sool, sidoo kale waxa aad ka war haysaan jabhadda gashay Buurta Gacan-libaax iyo halka uu dalku marayo guud ahaan marka laga eego dhinaca amniga.

Marka ay xaaladda amnigu heerkan marayso, waxa inagu waajib ah, innaga oo gole ah, inaan si odaytinimo iyo masuuliyad leh u fikirno, isla markaana aan isku dayno inaan ka qaadanno door muuqda oo wax-ku-ool ah xalinta arrimaha amniga dalka.

Maanta ma aha maalin xildhibaanada qaranka, masuuliyiinta dalka, iyo cid kasta oo mansab haysa ama aan haysanba ay arrinta uga sii dari lahaayeen. Maanta waa maalintii la isugu iman lahaa, la isu garab istaagi lahaa, lana taageeri lahaa cid kasta

oo nabadda ka shaqaynaysa. Waa maalintii aynu garab iyo gaashaan siin lahayn cid kasta oo kelmad wanaagsan ku dhawaaqda.

Ma aha maanta in masuul kastaa u hadlo si aan xilkasnimo ahayn ama u hadlo qof aan xil ka saarnayn wadanka. Waxaad ka war qabtaan in xaalada amniga ay jiraan kooxo isu abaabulay sidii nabadda looga shaqayn lahaa, waxaana mudan in dadkaa la ixtiraamo, la garab istaago, wixii lala qaban karayana lala qabto.

Sidoo kale, ma aha mid munaasib ah in masuul ha ka tirsanaado mucaaradka ama xukuumaddaba uu ku hadlo hadal aan miisaamanayn. Hadal kasta oo warbaahinta loo maro oo xaaladda sii xumaynaya waa arrin ceeb iyo nusqaan leh. Waxaan ku baraarujinayaa shacabka reer Somaliland in nabaddu tahay waxa ugu dan weyn ee aynu wada leenahay.

Sida nabaddu ku iman lahaydna waa iyadoo si wadajir ah oo la isla oggol yahay looga shaqeeyo, mucaarad iyo muxaafadba ay miiska wada fadhiistaan, arrimahana ku dhammeeyaan wada-hadal iyo is-afgarad. Arrintaasi waxa gacanta ku haya odayaal, waxa kale oo ku jira Golaha Wakiillada, waxa kale oo ku jira shacab badan oo isku dayaya in xaaladdan nabad loogu soo dabaalo.

Sidaa awgeed, waxaa inaga la rabaa, marka aynu hadleyno gudaha golaha iyo marka aynu bannaanka joogno labadaba, inaanan ku hadlin hadal aan xilkas ahayn, balse aynu ku hadalno hadal wanaagsan oo xal u dhow, kana fogaanno hadal dadka sii kala fogaynaya.

Waxaad ka war qabtaan in arrimaha amniga ee taagani ay ka dhasheen arrimo siyaasadeed, arrimahaas siyaasadeedna waa kuwa maanta u baahan in xal laga gaadho. Xalka arrimahaas gacantaa lagu hayaa, waxaana inaga gudboon inaan sugno, ku qanacno, kuna dabagalno wixii xal ah ee laga soo saaro, innaga oo gole ahaan ka qaadanayna kaalinta na saaran ee ansixinta iyo dabagalka.

Waxaan kale oo ku darayaa, walaalayaal, si aynu uga wada qayb qaadanno ilaalinta amniga, inaynaan abuurin arrimo kale oo amniga dhibaato ku keenaya. Tusaale ahaan, arrimaha dawladaha hoose ee saaxiibaday ka hadleen, sida furista kalfadhiyo aan caadi ahayn, inkasta oo ay sharci ahaan sax tahay, haddana su'aashu waxay tahay: maanta ma munaasib baa?

Xilligan aynu joogno, waxaad ogtihiin halka ay marayso xaaladda amniga. Rabshado kale oo la abuuro ma aha wax ku habboon. Waxaa habboon in waqti la siiyo, marka xaaladdu degto oo arrimuhu kala degaan, markaas arrimahaas waqtigooda loo qabto. Laakiin waqtigan xaadirka ah, kuma talinayo in arrimahaas lagu deg-dego, maadaama ay sii xumayn karaan xaaladda jirta.

Marka laga yimaaddo arrimaha amniga, walaalayaal, waxaad ka war haysaan xaaladda bulsho iyo dhaqaale ee uu dalku ku jiro. Waxaad ka war qabtaan nolol-

maalmeedka shacabka halka uu marayo, caafimaad-darrada dalka ka jirta, iyo dhibaatooyinka kale ee bulsho. Dhammaan arrimahaas waxa sal u ah amni-darro, maaddaama meel aan amni ka jirin aan laga sheekayn karin horumar, adeeg bulsho ama nolol sugan.

Sidaa darteed, maanta waxaan doonaynaa in goleheenna uu dhexda u xidho arrimaha dalka, kana noqdo qayb ka mid ah xalinta amniga iyo siyaasadda, si xal loo helo oo ay shacabka oo dhami ku wada qanacsan yihiin, dhiigguna u joogsado, nabadgalyaduna dalka ugu soo laabato.

Marka ay sidaa tahay, walaalayaal, masuuliyadda inaga saarani ma aha inaan xisbiyo u shaqayno, ma aha inaan xukuumad u shaqayno, ma aha inaan urur ama cid gaar ah u adeegno. Masuuliyadda inaga saarani waa inaan u shaqayno danta dalka, dadka iyo diinta, sida aynu ugu dhaaranay Kitaabka Alle. Sidaas darteed, si kasta oo ay ku iman karto, waa inaan noqonnaa qayb ka mid ah xalinta arrimaha, kana fogaannaa hadal kasta oo ka hor imanaya dantaas guud.

**Md. Jamaal Cali Aadan** *(5Min, 33Sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, sida aad ka wada war qabtaan, xaaladda guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland maanta waa mid siyaasadeed, mid bulsho iyo mid amni, dhammaanna ma aha kuwo ku socda jidkii saxda ahaa.

Muddo ku dhow lix sano, qarankeennu waxa uu la daalaa dhacayaa hoggaan-xumo, taas oo maanta keentay in dalku istaago meel aan wanaagsanayn. Arrimahaas saamayntooda waxa laga dareemay dhaqaalaha, amniga, iyo xiriirka dibedda.

Mudanayaal, Golahan Wakiilladu waxa uu lahaa fursad labadii sano ee u dambeeyey inuu wax ka qabto hoggaan-xumadaas, balse waxaa muuqata inaan wax weyn laga qaban, isla markaana doorkii la xisaabtanka iyo kor-joogtayntu uu aad u gaabisay. Golihii wuxuu u ekaaday daawade daawanaya xaaladda guud ee dalka.

Shaqada golahan kuma jirto maslaxad, isu-jiid-jiid ama dano gaar ah. Shaqada golahan waa ilaalinta shuruucda dalka, dejinta xeerarka, iyo hubinta in xeerarkaasi dhaqan galaan. Waxaa muuqata in shaqadii golaha ay u gashay baryootan, taas oo aan ahayn waxa dastuurku innaga rabo.

Golahan waa gole dabeer ah, waa gole la xisaabtan iyo kor-joogtayn. Sidaa darteed, taladayda koowaad waxay tahay in Golahani ka faa'iidaysto awoodihiisa dastuuriga ah. Golahan waa hay'adda ugu sarreysa ee xeer-dejinta dalka, haddii uu waajibaadkiisa dastuuriga ah gudan waayo, qayb ayuu ka noqonayaa dhibaatooyinka dalka ka taagan.

Waxaad ogtihiin in xeerar badan oo ay ansixiyeen Golayaasha Baarlamaanka, oo uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland saxeexay kana dhigay kuwo dhaqan-gal ah, aan si dhab ah loogu dhaqmin. Tusaale ahaan, xeerkii is-maamulka gobollada iyo degmooyinka, qaar ka mid ah qodobadiisa waxa lagu baabi'iyey wareegtooyin ay soo saartay xukuumaddu, taas oo aan sharci ahayn.

Golayaasha deegaanku waxay leeyihiin madax-bannaani, xeer baana caddeeyey awoodda ay u leeyihiin inay si xor ah u qabsadaan kalfadhiyadooda marka ay u baahdaan. Sidaa darteed, mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa in Golahani soo saaro qaraar cad oo lagu fasaxayo mudanayaasha golayaasha deegaanku inay si xor ah u qabsadaan kalfadhiyadooda marka ay baahi u arkaan.

Sidoo kale, mudanayaal iyo mudane Guddoomiye, waxaad ogtihiin in arrinta siyaasadeed ee waddanku ay tahay mid cakiran, isla markaana Goleheenna Wakiilladu qayb ka yahay cakirnaantaas siyaasadeed ee taagan. Sidaas awgeed, taladaydu waxay tahay in xeerarka doorashooyinka uu golahani dhamaystiro.

Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal, waa masuuliyad uu golahani ka warwareegayo, waa masuuliyad uu ka waabanayo, balse waa masuuliyad ku waajib ah in uu guto, waana dhamaystirka xeerarka doorashooyinka ee taagan. Sidoo kale, mudanayaal iyo mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa in garsoorka dalka oo ay ka taagan tahay cabasho badan, golahani intii uu joogay aan wax badan laga qaban.

Waxaa jira muwaadiniin badan oo reer Somaliland ah oo xidh-xidhan, kuwaas oo siyaabo kala duwan ay cadaalad-darro ugu dhacday. Waxaa loo baahan yahay, mudane Guddoomiye iyo mudanayaal, in cadaaladda oo ah tiirka ugu weyn ee bini'aadamku haysto si dhab ah loo ilaaliyo, maaddaama xurmada bini'aadamku tahay arrin mudan in mar walba la dhowro.

Sidaas darteed, mudane Guddoomiye iyo mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa in si xilkasnimo, waaayeelnimo iyo masuuliyad ku jirto arrimahan looga shaqeeyo, isla markaana goluhu si dhab ah isu weydiiyo doorkiisa ku aaddan ilaalinta cadaaladda iyo xaqa muwaadiniinta.

**Md. Nuuradiin Axmed Dayib** *(7Min, 24Sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Ilaahay baa mahad leh. Halkan marka hore waxaan rabaa inaan tacsi uga diro Abwaankii weynaa ee Jaamac Kadiye, Ilaahay ha u naxariisto oo Janadii haka waraabiyo. Abwaankaas weyn dhimashadiisa waxaa ka dhashay hadal muran badan dhaliyay, iyadoo hay'adaha qaarkood si aan munaasib ahayn uga hadleen sida uu u geeriyooday, sidaas darteed waxaan halkan uga dirayaa tacsi tiiraanyo leh.

Intaas ka dib, waxaan rabaa inaan ka hadlo xaaladda guud ee dalka. Waynu wada ognahay halka ay marayaan dhibaatada iyo xaaladaha jira. Waynu ka dheregsanahay dedaallada loogu jiro nabadda, sidoo kalena waynu ognahay halka ay wax marayaan iyo sida ay u socdaan.

Hadalkayga waxaan ku saleeyaa laba arrimood: maxay dantu ku jirtaa oo ay tahay in la qaato, iyo sidee ayay suuragal u tahay in halkaas lagu gaadho?

Waxaan soo jeedinayaa, anigoo la qabaa xildhibaan Maxamed Khadar Daahir, in arrimaha dawladaha hoose iyo kalfadhiyadoodii warqadda lagu joojiyay aan maanta la soo dayn, maadaama xaaladda jirta aanay ku habboonayn.

Maanta ma aha maalin nin-jeclaysi, ma aha maalin olole, waa maalin lagu badbaadinayo dalka. Waxaan arkayay dad ololeynaya, balse maanta ma aha maalintoodii, waxaana ku boorinayaa inay arrintaas ka waaniyaan.

Waxa maanta danta dalka iyo dadku ku jirtaa waa in xeerkii halkaas ku qoyay dib loo soo cusboonaysiiyo, boodhka laga jafo, wixii lagu dari karana lagu daro. Maanta ma aha in lagu wareero waxa laga yeelayo arrimaha doorashooyinka, balse waa in aynu wadajir u eegno waxa danta guud inoo ah, annaga oo aan isu kala saarin mucaarad iyo muxaafad.

Waxyaabaha khilaafka dhaliyay waxa ka mid ah gelitaanka ururrada siyaasadeed oo aan sharci cad loo hayn, halka markii hore arrintu ku xidhnayd dawladaha hoose oo si habaysan u socotay. Hadda oo dawladaha hoose laga reebay, arrintaasi iyaduna dib-u-eegis ayay u baahan tahay.

Wax aan sharci loo hayn oo khilaaf intan leeg dalka geliyay in arrin siyaasadeed laga dhigo lana fuulo minbarro ma aha mid ku habboon, mana aha meel ay arrintu ku habboon tahay.

Waxaan bogaadinayaa dhammaan cid kasta oo nabadda, wanaagga iyo dhexdhexaadinta ku jirta. Waxaan aaminsanahay in dadkaas nabadda ka shaqaynayaa yihiin kuwii loo igmaday, ha noqdaan gole wakiillo ama madax-dhaqameed. Ma aha in dad shaqo loo diro dabadeedna laga canaanto; dhaqankaasi waxa lagu yaqaan nidaam kaligii-talisnimo ah oo aan wanaagsanayn.

Marka dad shaqo loo igmado, la aamino, waxaa wanaagsan in laga danbeeyo wixii ay soo saaraan. Madax-dhaqameedka ku hawlan isu-soo-dhoweynta waan bogaadinayaa, waanan idinla shaqaynaynaa, waanan idin garab taaganahay caqabad kasta oo idin soo waajaha.

**Md. Axmed Muuse Jaamac** *(14Min, 21Sec):-* Waad mahadsan tahay, Guddoomiye. Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Awalba Ilaahay baa mahad leh. Guddoomiyaha iyo

Mudanayaasha dhammaantiin waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka. Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuhu.

Mudanayaal, waxaynu ka hadlaynaa xaaladda guud ee dalka. Xaaladda guud ee dalku waa mid dhinacyo badan leh: mid amni, mid siyaasadeed, mid abaareed, mid roob-la'aan ah, iyo arrimo kale oo fara badan. Qodobka 39aad ee Dastuurku wuxuu tilmaamayaa doorka guud ee Golaha Wakiillada, isaga oo caddeynaya in Golaha Wakiilladu yahay wakiilka dadweynaha, qaybta kowaad ee xeer-dejinta dalka, isla markaana leh awoodda ansixinta xeerarka, oggolaanshahooda iyo ilaalinta siyaasadda guud ee hoggaaminta dalka. Taas macnaheedu waa in dastuurku ina siiyay awood ballaadhan oo aynu wax kaga qaban karno xaaladaha dalka.

Marka mudanayaashu ay wakiil ka yihiin shacabka, waa in marka laga hadlayo xaaladaha taagan aan lagu hadlin dareen xisbi, urur, mucaarad ama muxaafad, balse lagu hadlo dareenka shacabka reer Somaliland.

Maanta shacabka Somaliland cabsi badan buu qabaa, culaysyo badan baa saaran, colaado ayaa jira, sicir-barar baa jira, intaas oo dhanna waxa u dheer muran siyaasadeed oo noloshoodii si weyn u khalkhal geliyay. Sidaas darteed, waa in aynu ka hadalnaa xaqiiqda jirta, isla markaana ilaalinaa sharciga, annagoo xeerarka iyo dastuurka ku dabaqayna xaaladda taagan.

Dastuurka Somaliland kama marna in xaaladaha iyo khilaafaadka siyaasadeed lagu xalliyo dariiq nabadeed iyo wada-hadal, sida ku cad Qodobka 10aad farqadiisa 4aad, waxaana aasaas u ah wada-tashi iyo talo-wadaag, kuwaas oo ka mid ah mabaadi'da dastuurka. Nasiib darro, arrimahaas badankood maanta waa la baal-maray.

Dhinaca kale, ilaalinta xeerarku waa lama huraan. Colaadaha jira, Ilaahay ha inaga soo afjaro, dedaallo badanna way socdaan, ha noqdaan colaadda Laascaanood ama tan ka taagan Buurta Gacan-libaax. Dhammaan inta ku dhimatay, ciidan iyo shacabba, waan u tacsiyadaynayaa. Haddana, culayska ugu weyn ee maanta ina haya waxa sal u ah muranka siyaasadeed ee doorashooyinka.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaynu ognahay in Komishanka Doorashooyinku 17/07/2023 ku dhawaaqay wakhtiga doorashooyinka, isaga oo cayimay doorashada Madaxtooyada iyo tan xisbiyada. Si kastaba ha ahaatee, cayimaadda doorashada xisbiyada ee 28 December ma waafaqsana Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Codbixiyayaasha Xeer Lr. 91/2020, gaar ahaan qodobbadiisa 2aad, 3aad, 6aad, 10aad, 12aad iyo 16aad farqadiisa 5aad.

Xeerkaasi wuxuu caddeynayaa in doorashooyinka qaranku ku koobnaanayaan Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa, Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Deegaanka, isla markaana aanu aqoonsanayn doorasho afraad. Sidaas darteed, ku dhawaaqista

komishanka ee doorashada ururrada tooska ah ma waafaqsana xeerka ay ku shaqeeyaan, mana laha sal sharci.

Sidoo kale, muddaynta ay komishanku sameeyeen ma waafaqsana qodobka 3aad ee Xeer Lr. 91/2020, kaas oo qeexaya xadka awoodda iyo mabaa'idiida guud ee komishanka. Qodobka 28aad farqadiisa 2aad ee Dastuurkuna wuxuu caddeynayaa in xeer kasta ama tallaabo ka hor imanaysa dastuurka ay tahay waxba kama jiraan.

Qodobka 10aad ee xeerkaas ayaa sidoo kale tilmaamaya in muddada xilalka doorashooyinka ay tahay shan sano, mana jiro doorasho kale oo xeerku aqoonsan yahay. Doorashada xisbiyaduna waxay ku hoos jirtaa xeer gaar ah oo muddadiisu tahay toban sano.

Qodobka 16aad farqadiisa 5aad wuxuu si cad u tilmaamayaa in awoodda komishanku ku kooban tahay ku dhawaaqista natiijooyinka doorashooyinka Madaxtooyada, Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Deegaanka oo keliya, taas oo caddeynaysa in aanay jirin awood sharci ah oo ay ku ku dhawaaqaan doorasho kale.

Sidaa darteed, ku dhawaaqistii Komishanka Doorashooyinka ee soo baxday 17-ka bisha 7aad waxay baal-marsan tahay, mana waafaqsana sida uu qabo Qodobka 6aad ee Xeer Lr. 91/2020 farqadiisa 1aad, oo dhigaya: "Komishanku ayaa cayimaya taariikhaha la qabanayo doorashooyinka si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerka." Haddaba, ku dhawaaqista Komishanku ma waafaqsana qodobkaas.

Waxaan qabaa, mudanayaal, in aynu xeerarka ilaalino, daba-galno, isla markaana kula xisaabtano cid kasta oo xayndaabkooda ka baxda, si aynu u hubinno in lagu shaqeeyo xayndaabka sharciga.

Waxaan soo jeedinayaa, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, sida aynu wada ognahay, inaan lagu dhawaaqi karin, lana qaban karin doorasho aan lahayn xeerkii lagu qabanayay. Doorasho waxa lagu dhawaaqi karaa, la mudayn karaa ama la qaban karaa marka la helo xeer qeexaya qodobadan soo socda:– Habka doorashada loo galayo, Hannaanka xalinta khilaafaadka iyo cabashooyinka ka iman kara doorashada, Sida loogu dhawaaqayo natiijada doorashada iyo Qaabka loo kala helayo.

Ma jiro xeer maanta tilmaamaya doorashada tooska ah ee ururrada iyo axsaabta qaranka. Sidaa darteed, go'aankii qaraarka Maxkamadda ee Xeer Lr. 14 kaga saaraysay Golayaasha Deegaanka waa in xeer loo rogaa; qaraar keligii xeer ma noqdo, waana in xeer laga dhigaa si doorashadu u qabsoonto.

Maanta culayska ugu weyn ee dalkeenna haystaa waa arrimaha doorashooyinka. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in la isa-saaro doorashada Madaxtooyada iyo doorashada Ururrada iyo Axsaabta Qaranka, si waafaqsan Qodobka 6aad ee

Xeerka Guud ee Doorashooyinka farqadiisa 3aad, oo dhigaya: "Komishanku wuxuu markiiba qaban karaa hal doorasho ama ka badan marka ay habboonaato." Maantana waxaan qabaa in xaaladdaasi taagan tahay.

Waxaan qabaa in si xal loo helo, lagana baxo caqabadaha jira ee muranka doorashooyinku ugu weyn yahay, loona yareeyo dhibaatada baahsan ee dalka ragaadisay, in la isa-saaro doorashooyinka ay tahay dariiq sharci ah oo xal lagu gaadhi karo.

Waxa kale oo aynu ognahay in dalka ay ka jiraan saddex doorasho oo kala ah: doorashada Madaxtooyada, doorashada Golaha Wakiillada, iyo doorashada Golayaasha Deegaanka, halka doorashada Golaha Guurtiduna aanay xeer u yaallin muddo ku dhow 25 sanno. Haddii maanta lagu daro doorasho kale oo aan xeer loo hayn, waxa ay noqonaysaa doorasho shanaad, taas oo micnaheedu yahay in sannad walba doorasho la galo, arrintaasna aynaan awood u lahayn, mana habboona in la meel mariyo wax aynaan awoodeeda lahayn.

Doorashada Golaha Guurtida waxay dib ugu dhacday xeer la'aan muddo dheer, maanta se doorashada Ururrada iyada oo aan xeer loo hayn baa la qabanayaa, taas oo ka soo horjeedda Dastuurka iyo xeerarka dalka. Tani waa masuuliyad aynu ku dhaaranay inaan ilaalinno dalka, dadka iyo diinta, isla markaana aynu ku dhaqanno shareecada iyo shuruucda dalka.

Sida uu Illaahay SWT Quraanka ku sheegay, ummad ahaan waxa aynu ku noqonnay ummadaha ugu khayrka badan saddex qodob dartood: in aynu wanaagga is farno, xumaantana iska reebno, isla markaana Ilaahay rumayno. Haddii aynu xumaanta iska reebi wayno oo aynu wanaagga is-fari wayno, kama mid noqonayno ummadaha khayrka badan.

Waxaan soo jeedinayaa in golahani yahay gole leh awood dastuuri ah, kana jawaabi kara xaaladaha dalka. Sida aynu Laascaanood u eegaynay ilaa ay gubatay, waa inaanay noqon in aynu dalka intiisa kale u eegno ilaa uu baaba'o.

Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in aynu awoodeenna muujinno, kana shaqayno xalinta arrimaha taagan, annagoo aan ku milmin urur, xisbi ama siyaasad, maaddaama golahani yahay gole ay ummadi soo doortay. Ummaddii ina soo doortay maanta cabsi ayay ku nool yihiin, iyagoo ka welwelsan amnigoodii iyo dhaqaalehoodii, waana waajib in aynu culayskaas ka qaadno.

**Md. Maxamuud Faarax Jaamac** *(7Min, 02Sec):-* Bismillaahi. Mudane Guddoomiye iyo dhammaan Mudanayaasha halkan joogga, waan idin salaamayaa.

Waad iigu dambeysiisay, Guddoomiye, balse hadalka intiisa badan waa dhammaaday, aniguna waxaan ahay kii ku gunaanadaya.

Waxaan ka hadlayaa xaaladda dalka, waxaana hadalkayga ku koobayaa saddex arrimood oo keliya: Gobolka Sool, ciidanka galay Buurta Gacan-libaax, iyo xaaladda siyaasadeed ee dalka ka jirta.

Gobolka Sool, waxaan tacsi u dirayaa odayaashii waaweynaa ee geeriyooday, oo ay ka mid yihiin marxuum amiir 80 jir ahaa, iyo Abwaankii weynaa ee Jaamac Kadiye. Waxaan leeyahay dhammaan Somaliland, Soomaaliya iyo guud ahaan ummadda Afrika, Ilaahay ha inaga siiyo samir iyo iimaan.

Waynu ognahay in khasaaraha Gobolka Sool ka jira labada dhinacba uu ka badan yahay ama ku dhow yahay 1,500 oo qof, dhaawacuna intaas ka badan yahay, barakacuna uu gaadhay ku dhowaad 200,000 oo qoys. Ilaa maanta xal looma hayo. Waxaan arrintaas ku dhaliilayaa Xukuumadda Somaliland ee jirta oo ka dhaga-adaygtay soo-jeedimo badan oo loo soo jeediyay sidii xal loogu heli lahaa.

Hay'ado badan oo caalami ah, dalal jaara, culimo, salaadiin iyo beesha caalamkuba waxay soo jeediyeen in ciidamada laga soo raro goobaha colaadda, laguna keeno goobo ammaan ah si wada-hadallo loo furo, balse nasiib darro, talooyinkaas lama qaadan, waxaana la doorbiday dhimasho, dhaawac iyo burbur, taasina xal noqon mayso.

Waxaan soo jeedinaynaa in arrintaas laga noqdo, ciidamada laga soo saaro, lana geeyo goobo ammaan ah si wada-hadal loogu dhammeeyo.

Arrinta Buurta Gacan-libaaxna waxay la mid tahay tii Laascaanood. Waxay u baahan tahay in aanay ku dhammaan xoog iyo mindi mindi, balse ciidamada la kala raro, wada-hadalkana fursad la siiyo. Waxaan hambalyaynayaa odayaasha, salaadiinta iyo guddiyada is-xilqaamay ee ka shaqaynaya nabadda, waxaana leeyahay ha la siiyo nafis iyo waddo ay ku shaqeeyaan, ciidamada ha la kala qaado.

Xaaladda siyaasadeed, waa tan aynu innagu abuurnay, Golaha Wakiilladuna qayb wayn ayuu ka ahaa. Hadda waxa loo baahan yahay in qaraar cad laga soo saaro, qaraarkaasna uu noqdo in xeerkii hore ee Golaha Wakiillada ansixiyeen ee Golaha Guurtidu soo celiyay dib loo soo saaro, lana qaato xalka ah in doorasho Madaxtooyo iyo mid Ururro ah la isa-saaro si wada-socod ah.

Haddii laga leexdo dariiqan oo dhaqdhaqaaqyo kale oo culus la bilaabo, waxa iman doona fawdo hor leh, taas oo ah waxa aynu maanta la daalaa-dhacayno. Ciidamadii tababaran ee booliiska ahaa ayaa ku le'day, cid dambe oo naga dhimatana diyaar uma nihin.

Guddoomiye, canaanta ugu weyn adigaa leh, waayo adigaa ahayd inaad Madaxweynaha la kulanto, Golaha qaraar ka soo saarto, kana hortagto wixii maanta dhacay. Maanta waa xilligii boodhka laga tuni lahaa, doorashada la qaban lahaa, ciidamada Sool laga soo saari lahaa, dalkana nabad loogu soo dabaali lahaa.

Cid idinka saraysaa ma jirto marka laga reebo Madaxweynaha, taladuna gacantiinna ayay ku jirtaa. Xildhibaanaduna way idinla socdaan, sidaa darteed, qaraar Golaha ka soo saara oo noqda mid xakamaynaya xaaladda dalka, nabadgelyadana iyo siyaasaddana wax ka tari kara, ee aan noqon hadal iyo cajlado keliya. WSC.

**Md. Siciid Jaamac Xasan** *(7Min, 17Sec):-* Bismillaahi. Mudane Guddoomiye, waad mahadsan tahay. Guddoomiyaha, Mudanayaasha, Saxaafadda iyo Shaqaalaha, Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.

Mudane Guddoomiye, waxa aynu ka hadlaynaa waa xaaladda dalka ee maanta taagan, annaga oo ah Baarlamaanka iyo Golayaashii loo soo doortay. Arrin aan rabay inaan ka afeefanaayo ayaa ah in aynu nahay xildhibaano laga soo doortay gobollada iyo degmooyinka dalka oo dhan. Haddii aad maqli jirteen oraahda ah "dawladda la wada leeyahay", dawlad la wada leeyahay waa Golaha Wakiillada, maaddaama oo gobol kasta laga soo doortay. Golaha Wakiilladu waa dawlad la wada leeyahay.

Muddo laba sannadood ah oo dhammaatay ayaynu halkan wada fadhinay. Waynu is-baranay, wax badan oo inaga beerdarroobay way jireen, laakiin maanta waxaan arkayaa in Goluhu bislaaday, in Goluhu wax badan qaban karo, in hoggaamintiisu maanta ka wanaagsan tahay sidii hore, isla markaana aynu wax badan qaban karno.

Markaan u soo noqdo, Mudane Guddoomiye, xaaladda dalka, waan soo koobi doonaa oo kuma dheeraan doono, waayo wax badan baa laga hadlay. Xaalad nabadgelyo, maamul, dhaqan-dhaqaale iyo xitaa Komishanka Doorashooyinka laftiisa. Xeerarkeenna marka ay shaqayn waayaan ama ay wax ka qaldamaan, waxa la raaci jiray wada-hadal, miis la wada fadhiisto, is-qancin iyo isu-tanaasul. Waxaad mooddaa in arrintaasi meesha ka baxday oo aanay jirin.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, dalkeenna waxa uu qaatay dimuqraadiyad la yidhaahdo, dimuqraadiyaddaas oo aan diinteena, dhaqankeena iyo hannaanka Islaamku wax badan ka muuqan. Waxaynu liqnay dimuqraadiyad u eg kiniin weyn oo qadhaadh, kiniinkaas oo aynu biyihii ku liqi lahayn ay ku istaageen. Sidaas awgeed, in dib loogu noqdo dhaqankeena, diinteena iyo is-maqalka ayaa ahayd.

Markaan u soo noqdo dhinaca nabadgelyada, nabadgelyo-darro, isku dhac iyo burbur waxa keena maamul-xumo, cadaalad-darro, wada-tashi la'aan iyo khayraadka dalka oo aan si sinnayn loo qaybin. Kuwani waa waxyaabaha keena burburka, is-naca iyo isu-tanaasul la'aanta.

Markaan intaas ka gudbo, dhibaatooyinka kale ee jira waxa ka mid ah xaaladda Laascaanood. Xaaladda Laascaanood kuma dheeraan doono, xildhibaano badan baa ka hadlay. Waxaan isleeyahay taladu mar waa lagu garan waayaa, marna waa lagu gaadhi waayaa. Markii dalalka deriska ah, daneeyayaasha doorashooyinka iyo

saaxiibbadeennu soo jeedinayeen in ciidamada la kala fogeeyo, wada-hadalna la furo, miiskana la isugu yimaaddo, waxaan isleeyahay haddii maalmahaas la qaadan lahaa taladaas, ciidamada la kala durkin lahaa oo Adhi-Caddeeye la keeni lahaa, xaaladdu halkaas ma gaadheen.

Waqtigaas Dhulbahante keligiis buu ahaa. Haddii aynu markaas ka soo durki lahayn, waxa laga yaabaa inay iyagu birta iska asli lahaayeen, inay is-dili lahaayeen, oo aanay iman lahayn Puntland, hiil Daarood, hiil Harti iyo waxyaabo kale oo maanta meesha yaalla.

Laakiin maanta cid walba way joogtaa, Laascaanood keliya ma aha. Xalkuna wuxuu ku jiraa in shir qaran laga yeesho, ummadda, wax-garadka, maamulada iyo madaxda lagu kulmiyo, arrintaasna si qaran loo wajaho.

Markaan ka gudbo Laascaanood, dhibaatooyinka kale ee nabadgelyo-darrada ah waxa ka mid ah cadaalad-darro sii badanaysa, doorashooyin wakhtigoodii dib uga dhacay, muddo-kordhin aan sharci ahayn oo Somaliland dhibaato ku ah, xorriyatul-qawlkii oo lagu tuntay, cabudhin iyo xadhig sii badanaya. Arrinta Buurta Gacan-libaax, waxaan isleeyahay waxa keenay waa waxyaabahaas aan sheegay iyo Komishanka Doorashooyinka oo ku dhawaaqay doorasho aan xeerkeeda hayn, isla markaana aan ku jirin Xeer Lr. 91/2020.

Sida aynu ognahay, Komishanku markii hore waxay sheegeen inay 9 bilood ku qaban karaan doorashada Madaxtooyada, dabadeed markii wakhtigii dhammaaday ayay maxkamadda waydiiyeen doorashadee la qabanayaa, iyagoo garan waayay doorkoodii. Arrintaas, waxaan qabaa inay qayb ka tahay waxyaabihii keenay Buurta Gacan-libaax, oof-wareenada, dhimashada ciidamadeennii tababaran iyo dad kale.

Waxaan tacsi u dirayaa dhammaan cidii ku dhimatay dhinac kasta. Illaahay ha u naxariisto intii dhimatay, intii ku dhaawacantayna Illaahay ha u booga-dhayo.

Haddii aan u soo dhowaado xalka, Mudane Guddoomiye, waxaan isleeyahay xalku wuxuu ku jiraa in la dhagaysto salaadiinta, ha noqoto kuwa beelaha sida beesha Habar-jeclo oo salaadiinteedu u kacday nabadda, salaadiinta beesha Arab, wax-garadka Somaliland oo dhan in la mideeyo, qaraarka ay soo saaraanna la wada qaato, annaguna gole ahaan halkan ka ansixino oo taageerno.

Waxa kale oo xalku ku jiraa in wixii ina soo maray aynu dib ugu noqono, sida uu ahaa Xaaji Cabdi Waraabe. Maanta waxaan odhan lahaa caqli ha shaqeeyo, Madaxweynaha dalka Muuse Biixi-na aynu caqligiisa ku kala badbaadno, oo uu aqbalo wixii halka laga soo saaro. Haddii ay noqoto doorashooyin la isa-saaro ama xal kale oo lagu heshiiyo, in la qaato ayaan qabaa. WSC.

**Md. Qaasin Aadan Saleebaan** *(10Min, 43Sec):-* Golaha waan salaamayaa dhammaan, Shir-guddoonka iyo Saxaafaddaba. Waxaan ku dhaliilayaa Saxaafadda in shalay ay ahayd inay goob-joog ahaadaan marka laga hadlayay xaaladda guud ee dalka, balse maanta ay maqan yihiin. Taasi waa nasiib-darro, maaddaama aragtidooda iyo doorkoodu muhiim yahay. Arrintaas waan ku dhaliilayaa Saxaafadda.

Waxaan ka cudur daaranayaa in maaddaama aan ka soo jeedo gobollo ay ka jiraan arrimo xasaasi ahi, la i siiyo wakhti igu filan, waanan dadaali doonaa inta aan ra'yigayga ku cabbiri karo.

Ugu horrayn, waxaan tacsi u dirayaa cid kasta oo dagaallada socda ku geeriyootay, gaar ahaan odayaashii qaaliga ahaa ee ay ka mid ahaayeen Jaamac Maxamed Diiriye (Digaale) oo ahaa oday reer Laascaanood ah, iyo Abwaan Jaamac Kaydiye Cilmi, labadaba si aan munaasib ahayn u geeriyooday.

Waxaan sidoo kale tacsi u dirayaa ciidamadeennnii ugu dambeeyay ee ku geeriyooday deegaanka Go'da Yar, anigoo guud ahaan dadka reer Somaliland ee labada dhinacba ka xun geeridooda. Inta dhaawacantayna Illaahay ayaan uga baryayaa caafimaad degdeg ah.

Waxaan Golahan u soo jeedinayaa in doodda xaaladda guud ee dalka la sii wado ilaa go'aan gole oo cad ka soo baxo. Guddidii loo xilsaaray wada-hadallada iyo xal-u-helidda arrimahana, waxaan u soo jeedinayaa in ay qodobada muhiimka ah si qoto dheer u daraaseeyaan, si berri loo helo meel lagu tixraaco.

Somaliland oo 32 sano jirsatay, dhul ahaan, waxaan filayaa inaynu ku jirno marxaladdii ugu adkayd: hadday noqoto amniga, arrimaha bulshada, sicir-bararka, isticmaalka taban ee qabiilka, ama hoos-u-dhaca xidhiidhka caalamiga ah. Dhammaan arrimahaasi waa tabashooyin jira, balse maanta xaaladda ugu culus waa tan amniga, taas ayaan maanta diiradda saarayaa.

Arrinta Laascaanood, waxaan xasuusinayaa Golaha iyo Shacabka 26-kii January 1991, maalintii Maxamed Siyaad Barre laga tuuray talada. Subaxdii markii aan galay Madaxtooyada Villa Soomaaliya, waxaan arkay dad badan oo guranaya qalab, hub iyo waxyaabo kale. Illaahay wuxuu ii sahay in aanan dhinacaas aadin, balse aan aado dhinaca faylalka iyo dukumentiyada, halkaas oo aan ka soo qaaday faylal badan oo muhiim ah.

Faylkii ugu horreeyay ee aan furay waxa uu ku saabsanaa dagaalladii 1988 ka socday gobolladii waqooyi ee Burco, Hargeysa iyo Berbera. Qoraalkaasi waxa uu ahaa warqad uu Alle ha u naxariistee Madaxweyneheennii hore Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal u diray xukuumaddii Maxamed Siyaad Barre, kuna sheegay in dagaalkaasi

aanu xal ahayn, balse uu burbur ku yahay midnimadii Soomaaliya iyo xukuumaddii markaas jirtay.

Waxa run ahaan ku jiray erayo aad u adag, geesinimo leh, dhiirranaan iyo daacadnimo muujinaya, kuwaas oo runtii aanan hore aqoon ugu lahayn Marxuum Maxamed Ibraahim Cigaal, Alle ha u naxariistee. Waxa xusid mudan in jawaabihii loo soo raaciyey ee tixraaca ahaa ay ka mid ahaayeen kuwo ay bixiyeen dad ka soo jeeda deegaannadii uu u doodayey, iyo dad kale oo ka soo jeeday xukuumaddii markaas jirtay, balse aan deegaannadaas ka dhalan, hase yeeshee goob-joog ka ahaa dhulka uu ka hadlayey ee gobollada waqooyi, kuwaas oo kala ahaa Berbera, Hargeysa iyo Burco. Jawaabahaasi waxay ka turjumayeen xaaladdii markaas taagnayd, iyagoo dhammaantood lid ku ahaa xaqiiqadii uu ka hadlayey Maxamed Ibraahim Cigaal, Alle ha u naxariistee, isla markaana beeninayey hadalkiisii, iyagoo leh: "Maxamedow, adigu sidan baad u sheegaysaa, xogta annagu meesha ka haynana ama dadka deegaanka nooga imanayaa waa sidan."

Sidaas awgeed, xaaladda Laascaanood waa mid suurtogal ah in maanta dad badani siyaabo kala duwan inoogu soo gudbinayaan, ha noqdaan kuwo ka soo jeeda deegaannadaas oo xilal ka haya xukuumadda, ama kuwo kale oo xog u soo gudbinaya si u gaar ah. Waa suurtogal in maanta ay jirto xaalad la mid ah taariikhdii hore, isla markaana ay jiraan xog badan oo is-khilaafsan. Waxa aan caddeynayaa in xaaladda Laascaanood ay marayso meeshii ugu adkayd, isla markaana ay muhiim tahay in Golahan iyo Qarankuba si gaar ah isha ugu hayaan.

Waxa haddana kacay dad tiradoodu ka badan tahay 250,000 oo qof. Waxa istaagay adeegyada bulshada, wax walbana way ka baxeen noloshii caadiga ahayd. Waxa ku soo batay magaalooyinkii isticmaalka maandooriyaha, ha noqoto wax la cabo ama wax la cuno, sida kiniinno la sheegayo inay qofka iyo jidhkiisaba ka qaadaan miyirka, dhammaan arrimahaasina way ka jiraan.

Intaas waxaa ka sii khatar badan in magaalooyinka ay ku socdaan madaafiic. Madaafiicdaas oo aan loo meel-dayin, kana mid ah madaafiic magaalo lagu ridayo. Haddii magaalo la rabo in la qabsado, waxa habboon in ciidan lagu aado, balse ma aha in magaalo madaafiic laga dhigo gees walba oo marba dhinac laga furo. Arrintaasi waa mid aad u naxdin badan, waxyeellona u geysanaysa dadkii hal-doorka ahaa ee aan xusay, carruur, dumar iyo dhammaan shacabka kale.

Waxaan ka digaynaa in madaafiicdaas la joojiyo. Alle ha u naxariisto Abwaan Gaariye, erayadiisii waxa ka mid ahaa:
"Ifafaalaha muuqda iyo ishay leedahay,
Maanta waxba yaan af-gobaadsane,
Intay doonto ha gaadhee,
Arramaa qarxi doonta eedayey.
Dharaar baa iman doonta,

Haddii Eebahay cayimin,
Afku hadal daayo.
Dharaar baa iman doonta,
Imaraadka sidiisi,
Ninba aag ku godoomo.
Dharaar baa iman doonta,
Dadka Sool iyo Awdal ee,
Aadanoow aad hagrateen,
Racadadoodu adkaato."

Taariikhdaas ayuu ku soo gabagabeeyey: "Ku darso, Axmedow, infaq baan arkayaa." Nin abwaan ah ayuu ahaa, eraygiisuna tuf-leeyahay. Marka maanta erayadaas la fiiriyo, waxa muuqata inay weli taagan yihiin.

Waxaan ku baaqayaa in laga shaqeeyo sidii loo raadin lahaa gobolladaas, loona dabageli lahaa dadkii barakacayaasha ahaa. Deegaannada aan laga soo doortay, sida Adhi-Caddeeye, waxaan dhaliilayaa in xukuumaddu dayacday baahiyihii dadkaas la soo barakacay, isla markaana aanay daboolin baahidoodii. Markii ay u soo carareen dhinaca ay xukuumaddu ka talinaysay, ma helin daryeelkii iyo sama-falkii ay ku lahaayeen, taasina waxay keeni kartaa in ay ku noqdaan goobihii ay ka soo barakaceen.

**Md. Yuusuf Faarax Warsame** *(4Min, 32Sec):-* Bismillaah. Shir-guddoonka, Xubnaha Golaha Wakiillada, Shaqaalaha Golaha Wakiillada, dhammaantiin Asalaamu Calaykum. Aad iyo aad ayaan idiin mahadcelinayaa, Mudane Guddoomiye, fursadda aad ii siisay inaan ka mid noqdo xildhibaanada ka doodaya arrimaha taagan.

Mudanayaal, waxaan idin xasuusinayaa in aynu halkan u nimi xal, umaynaan iman in aynu cid canbaarayno ama cid dhaliilno. Dadku waa dadkeennii, dalkuna waa dalkeennii, tabashooyin iyo wax-ka-tabasho way dhaceen. Tacsida waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horreeyey. Waxaan leeyahay Innaalillaahi wa innaa ilayhi raajicuun Abwaankeennnii weynaa Jaamac Kaydiye Cilmi, oo ku geeriyooday magaalada Laascaanood, kana dhintay gacan xaq-darro ah. Aad ayaan uga xumahay in gacan xaq-darro ahi ku dishay magaaladii Laascaanood. Waxaan tacsi tiiraanyo leh u dirayaa geerida Abwaanka Soomaaliyeed, Abwaan Somaliland, Abwaan Geeska Afrika laga yaqaanay, nin suugaan dhiirran lahaa oo aan la ilaabi karin.

Anigu hadalka ma badinayo. Waxa aan tilmaamayaa halka xalku yaallo. Maanta cid la eedeeyo waxba inama tari doonto. Xalku maanta wuxuu ku jiraa, Alle ha u naxariistee, Prof. Cali Khaliif Galaydh, oo lahaa "Somaliland waa la wada leeyahay," isagoo hadalkaas ku naf waayey.

Mudanayaal, waxa aynu nahay gole xeer-dejin ah. Waxa inaga baxay sharci hore, sharcigaas oo ahaa xeerka isa-saarka, kaas oo si sharci ah uga baxay Golahan. Waxaan leeyahay maanta dhibka taagan waxa aynu kaga bixi karnaa innagoo aan danaynayn mucaarad iyo muxaafid midna, balse ilaalinayna sharafta Golaha. Sharafta Golaha waxay ku jirtaa in xeerkii sharci ahaan uga baxay Golahan aynu ku dhaqanno, ku ixtiraamno, isla markaana ku xallinno dhibaatada maanta taagan. Aad iyo aad ayaan idiin mahadcelinayaa.

**Md. Ibraahim Maxamed Jaamac (Khadar-Gun)** *(8Min, 44Sec):-* Asalaamu Calaykum. Aad ayaan idiin salaamayaa dhammaantiin, waxaana si gaar ah ugu mahadnaqayaa Guddoomiyaha fursadda uu i siiyey. Wakhtigayga kama badinayo, waxaanan ku soo koobayaa qodobbada muhiimka ah.

Soomaali waxay tidhaahdaa colaadi waa madow, nabadduna waa macaan. Maanta se arrinta aynu ka hadlaynaa, inkasta oo aanan jeclayn in hadalkaygu canaan u badnaado. Marka hore, waxaan tacsi u dirayaa dadkii ku dhintay shaqaaqadii Laascaanood ee ilaa maanta taagan, gaar ahaan geeridii Digaale iyo Jaamac Kaydiye Cilmi, oo ahaa dad waaweyn oo qaali ah, laguna xasuusto dagaalkii 1977-kii markii aynu Soomaali ahayn. Abwaanku waxa uu ka mid ahaa dadkii afka ugu dagaallamay, isaga iyo Cabdi Bashiir Indha-buur.

Arrinkan aynu ka hadlayno, in kasta oo aynu nahay gole xeer-dejin ah, haddana Golaha Guurtida ayaa xil gaar ah u lahaa. Maalintii uu dagaalku Laascaanood ka bilowday, Guddoomiyaha Guurtidu waxa uu yidhi xildhibaanada waa la isu hayaa, "orod oo bad-cagaha soo geliya," wuuna fasaxay. Shaqada Guurtidu waa amniga iyo xalinta arrimaha noocaas ah, waana inay kaalintooda buuxiyaan.

Maanta waxa ina soo foodsaaray xaalad kale oo ah Gacan-libaax, taas oo u socota sidii hore ee loo maareeyey Laascaanood. Soomaalidu waxay tidhaahdaa "balaayo daaman la qabto ayay leedahay, dabo la qabto maleh." Halkii xal laga raadin lahaa, waxa la adeegsaday eedayn iyo magacaabis aan xal ahayn. Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal saddex sano ayuu dagaal ku jiray, haddana Somaliland wuu isku soo dabaalay, waana ku guulaystay, magac iyo maamuusna wuu helay. Nin walbana taariikh baa qori doonta.

Guddoomiyaha Golaha Guurtidu ma buuxin kaalintii Ina Sheekh Madar iyo Xaaji Cabdi Waraabe. Guurtidii maanta waxay ka leexatay doorkeedii taariikhiga ahaa. Waxa inaga dhexeeya wada-shaqayn, Guurtiduna waa odayaashii inoo talinayey ee ahayd inaynu wada shaqayno, waana in aynu taageernaa.

Ugu dambayn, waxa jira qalad siyaasadeed. Nabarka mililka ah dusha lagama dhayo. Arrintani waxay ka dhalatay siyaasad xisbiyo iyo doorashooyin dib u dhacay. Xeerkii aynu ugu talo-galnay doorashooyinka ayaa la carqaladeeyey. Anigu

wali waxaan aaminsanahay in maalintii kartoonkii Aadan Baradho lagu soo riday xeerarkii aynu ka soo shaqaynay ay ahayd maalintii Somaliland cagta la saaray.

Somaliland maanta waxay u socotaa sidii filimkii markabka Tiitaanik oo isaga oo sii degaya ay dadkii dalabaadka sii qaadayeen. Maanta Laascaanood way ku dhacday gobolladii bari, mana aha wax fudud.

Guddoomiye Giirre ayaa soo dhex galay oo yidhi: "Mudane, canaanta ha ku dheeraan. Adiga oo raalli ah, xal baa lagaa sugayaa, iyo waxa ummadu ku badbaadayso." Mudane, cid baa nabadda gacanta ku haysa, maxaynu ka odhanaynaa? Arrimahaas ayaa ah kuwa maanta mudnaanta leh.

Md. Ibraahim oo hadalkiisa sii wata ayaa yidhi: Madaxweynaha meesha uu habeen iyo maalin canaantamayo, maxaa aniga oo xildhibaan ah canaanta ii diidaya? Waan hadlayaa, wakhtigaygana i sii, Mudane Guddoomiye. Miyaan xeer-hoosaadka baal marayaa? Haddii kale, waxaan moodayaa inaad af-dawladdood igula hadlaysid oo aanad ahayn guddoomiyahaygii. Wakhtigayga i sii. Xildhibaan kale ayaa ku duday isaga oo aan hadal 15 Min ka yar ku jirin, adiguna 30 Min ayaad u ogolaatay.

Xalku waxa uu ku jiraa, haddii la doonayo in nabadda Somaliland la hagaajiyo, in loo yeedho guddidii uu Madaxweynuhu eryey; guddidii markay isku dayeen inay siyaasadda ka taliyaan ee ilaa madax-dhaqameedkii Sool ka yimid la eryey, culimadii la eryey, ganacsatadii la eryey, waddan-diidna lagu sheegay—intaas horta ha loo yeedho.

Somalilandna dastuurka ayaa inoogu qoran in, haddii arrimuhu adkaadaan, lagu noqdo halkii Somaliland ka soo bilaabantay, shir-qaran la qabto oo arrimaha taagan laga wada hadlo. Somaliland maanta shir-qaran bay u baahan tahay. Uma baahna in Muuse (Madaxweynaha) lagu haleeyo, uma baahna in Baarlamaanka lagu haleeyo, uma baahna in Saleebaan (Guddoomiyaha Golaha Guurtida) lagu haleeyo, uma baahna in xisbiyo lagu haleeyo. Somaliland xalkeedu maanta waxa uu ku jiraa in shir-qaran la qabto, isku-joojin la sameeyo, walibana Madaxweynuhu hoggaamiyo, kharashkiisana bixiyo.

Madaxweynaha waxaanu ku garab taaganahay nabadda, isku-wadidda dadka iyo dalka. Madaxweynaha waxaanu ku garab taaganahay inuu noqdo hormuudkii oo uu buuxiyo kaalintii Maxamed Ibraahim Cigaal, kaalintii Madaxweyne Daahir Riyaale, iyo kaalintii Madaxweyne Cabdiraxmaan Tuur. Waxaan xasuustaa Madaxweyne Cabdiraxmaan Tuur gadhkiisa oo laga qaaday, kabihiisana laga siibay; dulqaadkaas ayuu ku soo gaadhsiiyey shirkii Boorama 1993, waana ninkii soo hooyey guushii lagu xoreeyey dalka, shirkii lagu doortay Madaxweynaha, isaga oo Guddoomiye ka ahaa.

Madaxweynuhu miyaanu garan wayey wixii Ina Cigaal gartay, wixii Cabdiraxmaan gartay, wixii Ina Riyaale gartay? Isma-kiin baa ku jira. Haddii dalka la waalayo, sidaas ha lagu wado; haddii kalena maanta nabadda waanu kala shaqaynaynaa.

Xildhibaanada walaalahay ah, mid baan kula talin lahaa: kuraasta la isku baneeyo ma aha; Guddoomiye waa in laga amar qaataa, marka xildhibaanku xaajo qabana uu yidhaahdo “Guddoomiye ma baxaa.” Laakiin golihii in la is-dhagaysan waayo—maxaynu wax qabannaa innaga oo is-dhagaysanayn? Maxaynu dadka ku matalannaa? Somaliland caddaalad bay u baahan tahay.

Waxa la yidhi: “Rag caddaalad waayey sidii cawsha kala yaac.” Oof-wareen waxa keenay waa caddaalad-darro. Caarre waxa keenay waa caddaalad-darro. Gacan-Libaax waxa keenay waa caddaalad-darro. Wabar waxa keenay waa caddaalad-darro. Laascaanood maanta—oo ah badh Somaliland ka mid ah—anigu nin Hargeysa ku dhashay baan ahay, laakiin intii Soomaali dhul lahayd waan soo maray. Dhulka maanta inaga maqan ee dawladda loo magacaabay, adiguna waad ogtahay Mudane Guddoomiye, Muusena (Madaxweynaha) wuu ogyahay—ma ciidanka Goojacadde baa lagu maamuli?

Maanta Dhulbahante iyo Harti dawlad ayay samaysteen, waana ognahay, maanta waxay si toos ah hoos ugu jiraan Xasan Sheekh (Madaxweynaha Soomaaliya). Waynu arkaynaa; cadceed muuqata sacab laguma qariyo. Laascaanood way tagtay; ma inta kale ilaa ay tagto ayaynu sugnaa, sidii markabkii Tiitanik ee degayay?

Anigu maanta waxaan ku talinayaa, Madaxweynaha-na waan kula talinayaa, salaadiintayda-na waan kula talinayaa: “Habar-jeclo oo kali ahi nabad keeni maysee.” Nabadda aynu Bari ilaa Galbeed ka wada qabanno, Madaxweynuhuna kharashkeeda iyo hawl-galkooda ha qaado, hana ka daayo isaga iyo xisbigiisu doco-docaynta habeen iyo maalin ay sii wadaan.

Laascaanood baa argagixiso lagu sheegay, iyadoo la qaban karayey. Waxa lagu sheegay in lagu soo duulay. Nin cadhooday wuxuu doono ayuu ku dhaqaaqaa. Ina Kaahin (Wasiirka Arrimaha Gudaha) iyo Muuse (Madaxweynaha) maalintii ay baxayeen Xabashi bay u tageen; Soomaaliya ayaynu soo weerarnay annagoo ka mid ahayn, annagoo Xabashi wadanna. Waynu duminay. Marka ninka Dhulbahante ah maxaad ula yaabaysaa hadduu Daarood ku muusanaaday ama Harti u yeedhay? Halkaasaan kaga baxayaa. WSC.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ------------------------------------------------ | -------------------------------------- |